
# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## XEERKA QARANKA EE XANAANADA XOOLAHA

-




# XEER LR-34/2006

## GOLAHA WAKIILADA

HARGEYSA –SOMALILAND

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

## THE PRESIDENT

REF. JSL/DECM/249-764/042008 DATE 08/04/08

# DECREETO MADAXWEYNE NO:338/042008

**DHAQAN-GALKA XEER LR 34/2006**
**XEERKA xannaanada xoolaha**

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Ogolaanshaha Golaha Wasiirada ee Xeer Lr.34/2006.

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka JSL.

Markuu Helay: Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee ku suntan GW/KF-6/420/2008 ee 19/03/08 oo ay qodobada 5.1.1.2(b) ee Xeer Lr.34/2006 ee Xeerka Xannaanada Xoolaha oo ay ku meel mariyeen soo jeedintii Madaxweynaha.

Markuu arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland

**Wuxuu Soo Saaray**

*Dhaqan-galka Qodobada 5.1.1.2(b)aad* ***Xeer Lr. 34/2006 Xannaanada Xoolaha***

Allaa Mahad Leh

REPUBLIC OF SOMALILAND President

Daahir Rayaale Kaahin
Madaxweyne

Ref: GW/KF-6/420/2008 Date 15/3/2008

**Ujeedo: - Go'aanka Ansixinta Xeerka Qaranka ee Xanaanada Xoolaha (Xeer No. 34/2006)**

**GOLAHA WAKIILADA JSL**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka **77, 78** ee mashaariicda Sharci ee aan ahayn Maaliyada |
| **MARKUU ARKAY:** | Sixitaanka iyo toosinta la xidhiidha Mashruuc Sharcigan ee Madaxweynaha **JSL.** |
| **MARKUU DHEGAYSTAY:** | Talo bixinta la taliyayaasha Sharci ee **Golaha Wakiilada** kuna aadan Mashruuc Sharcigan. |
| **MARKUU U CODEEYEY:** | Soo jeedinta Madaxweynaha ee qodobka **5.1.1.2(b)** ee **X/No/34/2006** fadhigiisii **15/03/2008** oo ay goobjoog ahaayeen **(46)** Mudane oo ka tirsan mudanayaasha **Golaha Wakiilada**. |

# WUXUU ANSIXIYEY

Mashruuc Sharcigan Xeerka **Qaranka ee Xannaanada Xoolaha** ee Xeer **No: 34/2006** ka dib markii soo jeedinta Madaxweynaha ee ku aadaneyd Qodobka **5.1.1.2(b)** uu Goluhu diiday haseyeeshee wuxuu waayey codkii uu ku meel mari lahaa oo ah **2/3.** coddeyntu waxay u dhacday sedan: soo jeedinta Madaxweynaha waxaa ogolaaday **(17) cod** oo gacan taag ah waxaa diiday **(20) Mudane,** waxaa ka aamusay **(8)Mudane,** Gudoomiyuhuna muu coddeyn sida caadada ah.
Sidaas darteed waxaa meel maray soo jeedintii Madaxweynaha ee ku aadanayd Qodobka **5.1.1.2(b)**

**ALLAA MAHADLEH**

**Maxamed Xassan Kaahin (Keyse)**
**Xog. Guud ee Golaha Wakiilada**

**C/raxmaan Maxamed C/laahi (Ciro)**
**Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL**

# Jamhuuriyadda Somaliland

## Xeerka Qaranka Ee Xanaanada Xoolaha

(Xeer **Lr. 34/2006**)

### *Golaha Wakiilada*

**Markuu Arkay**: Qodobadda 11aad, 12aad, 17aad, 18aad, 39aad, 77aad ee Dastuurka JSL.

**Markuu Arkay**: Mashruuc sharciga xanaanad xoolaha ee Golaha Wasiiradu soo Gudbiyey.

**Markuu Tixgaliyey Kana dooday** : Warbixintii Guddida Deegaanka, Xoolaha, Beeraha, iyo Khayraad Dabiiciga ah.

**Markuu U Codeeyey**: Wax ka bedelkii iyo soo jeedimihii Golaha Guuritidu ku Sameeyey mashruuc sharcigii Xeerka Xanaanada Xoolaha.

Wuxuu ansixiyey soona saraay Xeerka Qaranka Ee Xanaanada Xoolaha.

# XEERKA XANAANADA XOOLAHA
## TUSMADA XEERKA


QAYBTA 1. Macnayn Bogga 6-10

QAYBTA 2. Aqoonsiga iyo gacan ku haynta cudurada. “ 11

CUTUBKA 2.1 Aqoonsiga cudurada “ 11

CUTUBKA 2.2 Meel uu ka jiro cudur dhiilo lihi. Bogga 13

QAYBTA 3. Dhoofinta, soo Dejinta iyo Gaadiidka Xoolaha. “ 14

CUTUBKA 3.1 Arimaha guud. “ 14

CUTUBKA 3.2 Rugaha Xuduudaha, x/guulada & goobaha Karantiinada.14

CUTUBKA 3.3 tallaabooyinka caafimaad ee ku haboon ka hor
& marka xooluhu ay dhoofayaan “ 15

CUTUBKA 3.4 Gaadiidka. “ 16

CUTUBKA 3.5 Sadho ka leynta, dulin dilida iyo wixii la mid ah. “ 19

CUTUBKA 3.6 dhakhtarka raacaya xoolaha dhoofaya “ 20

CUTUBKA 3.7 Ruqsadda siinta Gaadiidka. “ 20

CUTUBKA 3.8 Habraaca shahaadadda. “ 21

QAYBTA 4. Awoodda lagu bixinayo Awaamiirta iyo dejinta shuruucda
Dhoofinta/soo dejinta iyo gacan ku haynta C/Xoolaha. “ 22

CUTUBKA 4.1 Tixgelinta guud “ 22

CUTUBKA 4.2 Awooda bixinta tilmaamaha. “ 23

CUTUBKA 4.3 Shuruuc Qorista. “ 25

QAYBTA 5. Caafimaadinta Xoolaha ee Madax banaan xoolaha. “ 25

CUTUBKA 5.1 kala soocida xilalka qeybaha Dawliga ah iyo kuwa
Iskood u shaqeysta “ 25

CUTUBKA 5.2 Adeegyada madaxa banaan ee C/Xoolaha.

**Iyo shaqooyinka rasmiga ah " 27**

**CUTUBKA 5.3 Asaasida Golaha Qaranaka ee C/Xoolaha " 28**

**CUTUBKA 5.4 Magacaabista &Doorashada Gudoomiyaha Golaha Qaranka ee Caafimaadka xoolaha " 31**

**CUTUBKA 5.5 Diiwaan gelinta iyo liisan siin dhakhaatiirta. Farmashiistaha/kaaliyaasha C/Xoolaha " 33**

**CUTUBKA 5.6 Hawlaha adeegga caafimaad oo ay gutaan Dad aan dhakhaatiir aheyn " 36**

**CUTUBKA 5.7 Heysasho/Helida iyo qeybinta D/Xoolaha. " 37**

**QAYBTA 6. Shuruucda kale ee maaliyadda iyo ciqaabta " 40**

**CUTUBKA 6.1 Shuruucda maaliyadeed. " 40**

**CUTUBKA 6.2 Xayiraadda, qalista iyo asturaada xoolo buka. " 41**

**CUTUBKA 6.3 Shuruucda u gaarka ah eyda " 42**

**CUTUBKA 6.4 Qabashada xoolo ama oon xoolaad oo la arko Iney xeerkan ku gefsan yihiin. " 42**

**CUTUBKA 6.5 Ka Reebanaanta magdhaw la bixiyo. " 44**

**CUTUBKA 6.6 Shuruucda Ciqaabta.**

**QAYBTA 1aad.**

## *Macnayn.*

**Macnaynta Guud iyo Fasiraada Erayada Xeerkan.**
**Xoolo.**

Waxaa loola jeeedaa Naaslayda, Shimbiraha ama Shinida.

**Kaaliyaha Caafimaadka Xoolaha:-**
Waa Shakhsi ka haysta shahaadad/Diblooma ah, Laba ilaa sadex sano ah Dugsiga farsamada caafimaadka/seyniska Xoolaha, kuwaasoo ay ku jiraan kaaliyayaasha caafimaadka xoolaha, Farsamo-yaqaanada shaybaarada iyo kaaliyeyaasha baadhista Hilibka ee kawaanada

**Xaaladda Caafimaad ee Xoolo:-**
Waxa loola jeedaa xaaladda cudur xoolaad ee ka jirta wadan, ama dhul xadaysan ee ku astaysan xeerkan, kuna saabsan cudurka.

**Kaaliyaha Xaanaanaynta Xoolaha:-**
Waxa loola jeedaa Shakhsi ka haysta Shahaadada/Dibloomada Xanaanaynta Xoolaha laba ilaa saddex sano, oo ka soo baxay Dugsiga Farsamada ee Caafimaadka & Seyniska xoolaha.

**Urur:-**

Waxa loola jeedaa ururka Qaranka ee Caafimaadka Xoolaha.

**Goobaha Xuduudaha:-**

Waxa loola jeedaa goobaha xuduudaha ee sugidda caafimaadka xoolaha sida madaar kasta, deked, ama wado Kontorol, xero guulada, karantiinada iwm. una furan ka ganacsiga badeecadaha caalamiga ah.

**Ged Ama Xaalad Cudur:-**

Waxa loola jeedaa Neef ama Xoolo uu ku dhacay cudur ka dhashay jeermis, ama Dulin.

**Dhakhtarka xaqiijinaya Shahaadadaha:-**

Waa Dhakhtarka rasmiga ee dawliga ah ee caafimaadka xoolaha kaasoo saxeexaya ama bixinaya cadaymaha shahaadadaha caalamiga ah ee caafimaadka xoolaha, Tusaale Sarkaalka Caafimaadka xoolaha ee Dekedda, Dhakhaatiirta rasmiga ee Goobaha Xuduudaha ka bixinaya cadaymaha, sida Madaarka IWM.

**Adeegyada baadhista Caafimaadka Xoolaha:-**

Waxaa loola jeedaa bukaan baadhista, cudur baadhista daawaynta xoolaha buka, isticmaalka Dulin dileyaasha, dibedda iyo Gudaha, Qaliinka, Talo bixinta Caafimaadka xoolaha, iyo xaqiijinta caafimaadka xoolaha. Waxa kale oo intaa ka mid noqonaya talaalka lagaga hortageyo cudurada ku xusan Liistada 'B'.

**Xeer:-**

Waxaa loola jeedaa xeerkan oo ujeedadiisa lagu hagayo ama ay waafaqsantahay tilmaamaha OIE ee Xeerka Caafimaadka Xoolaha ee Caalamka.

**Daryeelaha Caafimaadka Xoolaha ee Bulshada:-**

Waxaa loola jeedaa xubin bulshada ka tirsan, oon lahayn wax barasho dugsi rasmi ah, laguna siiyey muddo gaaban, xirfad wax barasho, caafimaadka xoolaha isla markaasna kuna tijaabiyey ilaa heer bulshada iyagoo ay hoos iyo korba ka eegayaan dhakhaatiirta iyo Kaaliyeyaasha Caafimaadka xoolahu.

**Sadha ka leyn:-**

Waxaa loola jeedaa isticmaalka dariiqooyin ku quman in lagu laayo jeermiska ama dulinka keeni kara cudurada xoolaha, oo ay ku jiraan cudurada dadka iyo xoolahu kala qaadaan, waxa lagu isticmaala dhismayaasha, Gaadiidka, iyo walxo kala gadisan oo si toos ah iyo si dadbanba u sadhaysan.

**Dulin dilid:-**

Waxaa loola jeeda isticmaalka dariiqooyin ku quman in lagu tirtiro cayayaan **(Shilinta, Dhibiijada)** keeni kara cuduro ama inta badan gudbiya cudur dhaliyayaasha xoolaha. Kuwaas oo ay ku jiraan cudurada xoolaha iyo dadku wadaagaan.

**Baadhista Cudurka:-**

Waxaa loola jeeda tuhunka ama xaqiijinta jiritaanka cudur ama la tuhunsanyahay ama ku dhacay xoolo.

**Dhisme:-**

Waxaa loola jeedaa dhismeyaasha iyo dhulka ku wareegsan ee xoolo lagu hayo.

**Meel xadaysan (Seere) oo fayow:-**

Waxaa loola jeedaa dhul xadaysan oo si cad u qeexan, oo dal ka mid ah, oon sinaba looga soo sheegin, xaalad cudur ku tilmaaman kuna jirin xeerka kaasoo aan laga soo warin illaa iyo muddadii lagu xusay inuu cudurkaasi ku jiro Xeerka Caafimaadka Adduunka & inuu ka tirsan yahay kuwa ay saraakiisha caafimaadka xooluhu xuduudaha ku xakamaynayaan si buuxdana ugu fuliyaan xoolaha & wax soosaarka xoolaha & xamuulkooda.

**Xaalad Cudur Cusub:-**

Waxaa loola jeedaa tirada arrinka cusub ee cudur iyo dilaacistu ku dhacay xoolo lagu ogyahay khatarna ku ah oo degaano gaar ah oo waqti dhextaalo cayiman leh.

**Meel xadaysan (Seere) oo cudur ka jiro:-**

Waxaa loola jeeda Dhul xadaysan oo si cad u qeexan oo dal ka mid ah oo baadhitaan ka dib la ogaaday in cudur xeerka ku qeexan ka jiro. Dhulkaasi waa inuu yahay mid si cad ugu tilmaaman, wareegtana ay ku soo saareen maamulka caafimaadka xoolaha. Iyadoo ahmiyad la siinayo Dabeecada deegaanka, xaaladaha juquraafiyeed iyo jiritaanka ee kala gedisan iyo sidoo kale arrimaha saameeya cudur baadhista/fidista, iyo noocyada xanaanaynta xoolaha ee la sameeyey.

Dhulka muranku ka jiro waa inuu qayb ka noqdaa dal kuna jiraa badhtanka xuddunta amaba xudumaha ee cudurka ugu yaraan toban kiiloomitir (10km) goobaha si isdabajooga xoolaha loogu dhaqdo iyo 50km goobaha sida qaalibka ah loo daaqo.

- Goobaha dalka & xadka ee sadheysan waa inuu laasim jiraan hawlo wax ku ool ah oo rasmi kaasoo illaalinaya hawlgalada Caafimaadka xoolaha iyo wax soosaarkooda iyo gaadiidkooda.

- Mudada gacan ku haynta goobaha sadheysan waxay ku kala gedisan tahay, hadba nooca cuddurka & tallaabooyinka caafimaadka ee la adeegsadey iyo dariiqooyinka lagaga hortegeyo cudurka ee la fuliyey.

**Shahaadada Caalamiga ah ee Caafimaadka Xoolaha:-**

Waxaa loola jeedaa Shahaadada la siiyo badeecadaha oo waafaqsan Nidaamka O,I,E. kuwaasoo qeexaya shuruudaha caafimaad ee xoolaha iyo dadkaba looga baahanyahay, kuwaasoo lagu fuliyey, Badeecadaha la dhoofshay.

**Dhakhtar xoolaad oo Ruqsad haysta:-**

Waxa loola jeeda Dhakhtarka xoolaad oo ogolaansho u haysta adeega caafimaadka xoolaha.

**Liistada 'A' :-**

Waxaa loola jeeda liistada cudurada gudba, kuwaas oo iman kara, inay si aad khatar u ah oo degdeg ah u fida isagana gudbi karayaan lagana jeclaysanayn xuduudaha caalaamiga ah, waxayna, khatar ku yihiin dhaqan-dhaqaalaha ama cawaaqib xun ku yeelanayaan caafimaadka dadka, taasoo ahmiyad balaadhan u leh ka ganacsiga caalamiga ah ee xoolaha iyo wax soo saarkooda. Warbixinta waxa loo gudbinayaa O,I,E. inta badanna ay laga maarmaan tahay inay waafaqsanaadaan nidaamka O I E.

- **Liistada 'B':-**

Waxaa loola jeedaa Liistada cudurada gudba. Kuwaas oo ahmiyad wayn u leh dhaqan dhaqaalaha bulshada iyo caafimaadka dalka, kuwaas oo macno wayn u leh ka ganacsiga caalamiga ah ee xoolaha iyo wax soo saarkooda.
Warbixinta sida caadiga ah waxa loo gudbiyaa sanadkiiba hal mar xafiiska OIE, inkastoo warbixino joogto ah loo baahanyahay xaaladaha qaarkood lagama maarmaan u tahaysidii loo waafajin lahaa xeerka O,I,E.

**Wasiir:-**

Waxaa loola jeedaa wasiirka in muddo ah haya masuuliyadda arimaha xoolaha iyo Adeegyada caafimadka xoolaha.

**Xeer Wasiir:-**

Waxaa loola jeedaa sharuuc qoraal ah oo habmaamulka waafaqsaan, iyo awaamiir uu bixiyay Wasiirku isagoo raacaya Xeerkan.

**Cudur la aqoonsady:-**

Waxa loola jeedaa cudur lagu qorey liiska maamulka caafimaadka xoolaha, oo markii la ogaaday ama la tuhmay uu maamulkii caafimaadka xooluhu ka yeeshay taxadarkiisa.

**Dhakhtar rasmi ah:-**

Waxaa loola jeedaa dhakhtar loo awood siiyey maamulka caafimaadka xoolaha ee dalka, si uu u fuliyo ama u sameeyo caafimaadka xoolaha iyo baadhitaanka badeecadaha, markay haboonaatana bixiya shahaaddadooda.

**Oonta Xoolaha oo Dadku Quuto:-**

Waxaa loola jeedaa Hilib daray ah, waxa laga helo hilibka, Burcadka, wax soo saarka Beedka, Digaaga, Caanaha, wax soo saarka caanaha, Malabka oo markaas loo isticmaalayo quudka dadka.

**Xarunta Xakamaynta:-**
Waxaa loola jeeda adeegga ay isticmaalaan Masuulka Caafimaadka Xooluhu, inay ku xakameeyaan tiro xoolo ah oo loo qoondeeyay in la xayiro,
si aysan fool-ka-fool iyo si dadbanba ula yeelan wax xidhiidh ah xoolaha kale, laguna ilaaliyo xilli cayiman, si ay u helaan baadhitaan iyo daawaynku haboon.

**Diiwaan haye:-**
Waxaa loola jeedaa diiwaan hayaha Golaha Qaranka ee Caafimaadka Xoolaha.

**Diiwaan:-**
Waxaa loola jeedaa diiwaanka dhakhtaatiirta caafimaadka xoolaha ee uu hayo Diiwaan geliyuhu.

**Dhakhtar Caafimaadka xoolaha oo Diiwaan gashan:-**

Waxaa loola jeedaa dhakhtarka caafimaadka Xoolaha oo magaciisuu muuqdo kuna jiro diiwaanka Caafimaadka xoolaha ee uu diiwaangeliyuhu hayey muddadaasi.

**Dhakhtar Xanaano oo Diiwaan gashaan:-**

Waxaa loola jeeda dhakhtar xanaanaynta xoolaha oo maagaciisu ka muuqdo kuna jiro diiwaanka caafimaadka xoolaha ee diiwaangeliyuhu hayey muddadaasi.

**Gaadiid:-**
Waxaa loola jeedaa habkasta oo loo isticmaalo Gaadiid, Dhul, Cir iyo Bad.

**Hubin Iyo Ilaalin Goob Xadaysan (Seere):-**

Waxaa loola jeeda dhul cayiman oo uu ka jiro cudur ku tilmaaman xeerkan. Goobtaas oo si joogto ah dabagal loogu sameeyo, sida waafaqsan tlmaamaha **O.I.E** ee la caddeeyey.

**Maamulka Caafimaadka Xoolaha:-**
Meelmarinta tabaha waxaa loola jeedaa hay'ad dawli ah oo ka jirta dal, maamushana fulinta adeegyada caafimaadka xoolaha ee dalkaas oo dhan sida caafimaadka xoolaha, habka caddeynta caalamiga ah ee caafimaadka xoolaha sida ay tilmaamayso **O.I.E**, iyo kormeerka iyo hubinta sida hawshaasi u fushay. .

**Haya'dda caafimaadka xoolaha:**

Waxaa loola jeedaa adeegga caafimaadka xoolaha, kuwaas oo hoos yimaada maamulka caafimaadka xoolaha sitoos ahna uga masuul ah fulinta tabaha caafimaadka xoolaha ee goob cayiman oo ka mid ah dalka.Waxay kaloo masuul ka noqon kartaa bixinta ama kormmerka caddeynta Cafimaadka Xoolaha ee caalamiga ee goobtaas.

**Adeegga caafimaadka Xoolaha:-**

Adeegga caafimaadka xooluhu wuxuu ka kooban yahay maamulka iyo masuuliyadda dhammaan Adeegyada caafimaadka iyo Xannaanada Xoolaha.

**QAYBTA LABAAD (2)**

# Aqoonsiga iyo Gacan Ku Haynta Cudurrada

**Cutubka2.1**

**Aqoonsiyada Cudurrada:-**

**qodobka 2.1.1**

1. **Maamulka Caafimaadka Xooluhu**

b) wuxuu Samayn doonaa xaalad suurogalinaysa meelmarinta shuruucda caalamiga ah ee caafimaadka una hogaansamaan inay raacaan tusaalooyinka iyo talo bixinta machadyada caalamiga ah ee cadaymaha bixiya sida **OIE, WHO, SPS** iyo machadyada hawlfuddudeeya **FAO, WHO, IAEA**,

t) Iyadoo la sii marinayoxafiiska **O.I.E** iyo Gobollada kale/ururada caafimaadka ee caalamiga warbixinkasta oo lagama maarmaan u ah sidii loo dhimilahaa fidista cuduradda xoolaha ee muhiimka ah iyo sidii leyskaga kaashan lahaa si ka fiican xakameynta ballaadhan ee cudduradaasi iyadoo si dhab ah warbixintan soo socota loo qeybin doono.

- Warbixinta marxallada caafimaadka xoolaha iyo hababka dabagalka ka fayow qaba cudduradaas tilmaaman, goobo ka fayow liistooyinka cuddurada ee liis A iyo liis B, marka lagu daro shuruuda iyo nidaamka lagu hir gelinaayo xaaladda ka fayo qabka, soo gudbinta warbixintu waa inay noqotaa mid joogto ah oo dhakhso leh (Liiska A & cuddurrada Liiska B waxa weeye kuwa lagu sheegay cutubkan)

- Faahfaahinta awoodda dalku ku dhaqmayo inuu ku xakameeyo cuddurada gudba.

- Warbixinta farsamo gaar ahaanna tijaabooyinka iyo tallaalada biolojiyada ah lagu isticmaalley dhammaan ama qeyb ka mid ah dalka.

2. Maamulka caafimaadka xoolaha waxay aqoonsan doonaan xaqa uu dal kale u leeyahay inuu sameeyo qiimeynta adeegyada Caafimaadka Xoolaha halka asbaabahu ka jiraan, khuseeya ka ganacsiga xoolaha iyo wax soo saarka xooluhu iyo badeecadaha la xidhiidha ee ka dhexeeya labada dal iyadoo la maraayo nidaamka la xidhiidha tilmaanta O.I.E.

3. Dhakhar caafimaadka xoolaha oo kasta kaaliye caafimaadka xoolaha iyo kuwa kale ee aqoontaa lehi (tusaale-farmashiste dhakhtar X/Xoolaha daryeele caafimaadka xoolaha ee bulshada kaasoo heysta wixii sabab ah ee lagu rumeysan ama tuhmi karo jiritaanka cudur ee gudba, waa inuu isla markiiba warbixinta u gudbiyaa halka ugu dhaw ee mas'uulka ugu sareeya ee Caafimaadka Xoolaha ama Sarkaalka.

4. U gudbinta warbixinta mas'uulka ugu sareeya caafimaadka xoolaha amaba sarkaalka Degmada ama Degmada ku xigta, haddii ay amaba aanay degmadaasi ku ku oolin Gobol isku mid ah, ku fulinta amaba fulin l'aanta awoodda sharciyeed iyo u gudbinta waxbixinta Agaasimaha adeegga Caafimaadka xoolaha waxay noqon doonaan muddooyinka (tusaale maallinle, toddobaadle, bille, sannadle) iyo nooca ay yihiin habka isku dubaridka cadeeyey maamulka caafimaadka xoolahu ee ku soo baxay wareegto wasiir.

5. Ogeysiinta iyo tabintu heer kasta waa inay noqotaa muddo 24 saacadood gudahood ah

   b) Liiska cuddurada A dilaaca hore iyo dibu dilaacista cudurka
   t) Cudurada aan ku jirin liistada A haddii aanu cudurkaasi laheyn ahmiyad weyn oo fiditaan.

**List A and list B Diseases (OIE International Animal Health Code)**

## *List A Diseases:-*

***Food and mouth diseases, Vesicular Stomatitis , Rinderpest, Peste des petits ruminants, Contagious bovine pleuroneumonia, Lumpy skin disease, Rift Valley Fever, Bluetongue, Sheep pox and goat pox, African horse sickness, Highly pathogenic avain influenza, Newcastle disease.***

**List B Diseases within the category of moltiple species Diseases:-**

***Anthrax, Auujeszky's disease, Echinococcosis/Hydatidosis, Heartwater Leptospirosis, Qfever, Rabies, Paratuberculosis, new Wold Screworm (Cochliomyia horminivorax) Old world screwworm (Chrysomya bezziana) Trichinellosis.***

## List B Diseases within Category of cattle diseases:-

***Bovine anaplasmosis, Bovine babesiosis,Bovine brucellosis, Bovine gental campy lobacteriosis, Bovine tuberculosis, Bovine cysticeecosis, Dermatophilosis, Ezootic bovine leucosis, Haemorrtagic septicemia, infectiousbovine rhinotracheitis/infectious pustular vulvovaginitis, Thielerosis, Trichomonosis, Typanososomosis (tsetse-transmitted) Malignant cartarrhal fever, Bovine spongiform encephalopathy***

**List B diseases within the category of sheep and goat diseases:-**

***Ovine apididymitis (Brucella ocis), Caprine and ovine brucellosis (excluding B.ovis) caprine arthritis/encephalistis, contagious agalactia, Contagious coprine pleuropneumonia, Enzootic abortion of ewes (ovine chlamdiosis) ovine pulmonary adenomatosis,Nairobi sheep disease, salmonellosis (S.***

***abortusovis) scrapie, Maedivisna.***

**List B diseases within the catogary of avian disease:-**

***Avain infectious bronchitis, Avain infectious larynotracheitis, Avain tuberculosis, Duck virus hepatitis, Duck virus enteritis, Fowl cholera, Fowl pox, Fowl typhoid, Infectious bursal disease (Gumboro disease) Marek's disease, anain mycopplasmosis, Pullorum disease.***

## Cutubka 2.2
## Jiritaanka cudur la aqoonsaday ee meel xadaysan (seere)
## Qodobka 2.2.1

**1)** Maamulka caafimaadka Xooluhu waa inuu cudurada ku soo saaraa wareegto qeexaysa in Goobahan soo socda looga dan leeyahay xakameynta cudurada, sidaas oo waafaqsan tilmaamaha OIE:-

b) Goob Cudurka ka fayow (disease free zone)
t) Goob baadhis & hubin ah si loo kala sooco meesha sadhowday
j) Goob laga tallaalayo xoolaha cuddurka si looga ilaaliyo cudurku inuu ku fido meesha fayo qabta (disease free zone)
k) Goob sadhaysan oo cudurku ka jiro, marka dalka intiisa kale ka faya qabto cuduradaas.

1) **Goob Sadheysan**

b) Maamulka caafimaadka xoolahu, waxay kordhin kartaa, dhimi kartaa ama bedeli karta xadkii loo dhigay meesha lagu caddeeyey inay sadhaysan tahay.

t) Meel xadaysan (seere) waxaa loo qaadan karaa inay ku sadhaysantahay cudur khaas ah ilaa muddo aan ka badnayn mudada uu cayimay OIE, marka laga duulo mudada iyo xaaladda la soo weriyay iyo marka si buuxda looga hortago iyo ku haboonaanta tallaabooyinka sugidda caafimaadka xoolaha ee uu fuliyay maamulka caafimaadka xooluhu kuna sameeyay si looga hortego suurtagalnimda kacdoon amaba fiditaanka cudurka.

u) Waxaa xayiraad adag la saaraya dhaqdhaqaaqa xoolaha ku nool meesha sadheysan iyada oo laga qaadayo tallaabooyin:-

- *Neef nool kama bixi karo goob sadheysan*

- *Waxaa la adeegsan karaa qalab loogu qaado xoolaha sida baabuurta laguna geeyo kawaan u khaas ah kuna yaalo goobta baadhistu ka socoto si deg deg ah loogu qalo.*
- *Waxaa qudha ee soo geli kara goobta baadhistu ka socoto waa xoolo maamulka xooluhu kaantaroolayo, laguna sameeyey tijaabo kasta oo baadhis ah ka dibna dhakhaatiirtu caddeysay*

*inay ka fayow yihiin cudurka ka hor intaanay xooluhu ka soogelin goobtaasi.*

- *Waxaa kale oo xooluhu ka soo gudbi karaan goobta sadheysan haddii cuddurka meesha ka dhacay yahay mid aan fidin.*

## QAYBTA SADDEXAAD

## Dhoofinta, soo Dejinta & Rarka Xoolaha & Wax soo saarka Xoolaha.

### Cutubka 3.1
### Tixgelinta Guud

### Qoddobka 3.1.1

1) Wasiirka Wasaaradda Xoolaha isagoo la tashanaaya Wasiirada Ganacsiga, Daakhiliga, Dawladda Hoose, Rugta Ganacsiga iyo Hay'addaha kale ee ku xidhan, wuxuu meel marinaya dhoofinta/keenista xoolaha wax soo saarkooda iyo dhabooyinka suuq-geyntooda.

2) Lama dhoofin karo xoolo dhedig oo ah, Geel, Lo, Ido, Riyo, Fardo, iyo Dameero.

### Cutubka 3.2

### Goobaha Caafimaadka ee Xadka, Xero Guuladda iyo Karantiinada.

### Qodobka 3.2.1

1) Goobaha caafimaadka, xero guuladda iyo karantiinooyinka wa inay ahaadaan kuwa leh adeegga Caafimaadka xoolaha kana kooban shaqaale, qalab iyo guryo gaar ahaanna ujeededeedu tahay:-

   b) Ku sameynta Baadhista caafimaad, daweynta, buufinta dulinka oogada tallaalada tijaabada dhiigga. Iyo ku-qaadashada walxaha cudur baadhista shaybaadhinta ee laga qaado xoolaha nool iyo kuwa dhintayba (**Specimens)** ee looga den leeyahay cilmi baadhis.

   t) Baadhista iyo ka soocidda xoolaha tabaaleysan ee uu amaba lagu tuhunsan yahay inay ku sadheysan yihiin cudur xun.

   j) Waa in lagu sameeyaa sadha ka leyn iyo haddii suurtagal tahayba dulin ka dilis gaadiidka lagu isticmaalo qaadista xoolaha & wax soo saarkooda.

## CUTUBKA 3.3

**Tallaabooyinka Caafimaad ee ku haboon ka Hor & marka xooluhu ay u Dhoofaan.**

**Qodonka 3.3.1**

1. Waxaa dhoofi kara xoolo si sax ah loo caddeyey, kana yimi Deegaan ka fayow cudurada liiska A iyo in aanu Degaankaasi ahaan goob sadheysan waxa loo oggolaan doonaa inay dhoofaan.

2. Baadhitaanka iyo tijaabooyinka biyoolajigada ah, ee looga dan leeyahay ka ganacsiga caalamiga ah & tallaalada ee dalka loo dhoofinayo rabo, waxa lagu sameynayaa sida ku xusan tallooyinka O.I.E iyo waliba sidoo kale wadiiqooyinka sadha ka leynta & dulin dilista.

3. Xoolaha waxaa lagu eegayaa, ka hor intaanay dalka ka dhoofin dhulka xeroguusha iyo xarunta karantiinka haddaba marka uu ogaado dhakhtarka rasmiga caafimaadka xoolaha (baadhaha c/xoolaha)inay xoolahaasi caafimaad qabaan iyo inay ka fayow yihiin cuddurada liiska "A" amaba wax kale oo cudurrada faafa ah, muddada ka bogashada, xoolahaasi waxa loo rarayaa xagga xarunta karantiinka iyo amaba meesha ay ka baxayaan amaba laga dhoofinaayo.

4. Mudadda ka wareejinta xoolaha hal xarun illaa meel kale {Tusaale- dhulka x/guusha illaa x/karantiinka amaba laga kaxeeyo X/karantiinka illaa xagga Dekedda ay ka dhoofayaan amaba meesha xadka ee ay ka baxayaa} xoolahaasi waa inay la kulmin dhexgelin **xoolo cudurada u nugul.**

5. Ka hor dhoofitaanka xoolaha safar caalamiya, Hay'adda caafimaadka xoolaha dekeddu {dhekhtarka dekedda) madaarka amaba degmada ee ku taal xadka, haddii ay lagama maarmaan noqoto fulinyaan baadhitaanka xoolaha xilliga & meesha lagu baadhaya waa la sii diyaarinayaa si loo sameeyo wixii kastemka iyo wixii kale ee habmarisa, oo aanay u noqon mid hakad galo ama daahdo bixistoodu.

6. Hay'adda Caafimaadka xoolaha **(Dhakhtarka Dekedda)** sida ku xusan qoddobka shanaad 5aad waa inuu qaadaa tallaabooyinkan lagama maarmaanka ah:-

   b) *Inuu illaaliyo inaan la dhoofin xoolo qaba ama lagu tuhmay inay qabaan cudurada ku jira liiska "A" ama wax kale oo curudadda ah.*

   t) *In weelka ama gaadiidka qaadaaya xoolaha laga illaaliyo inay soo galaaan cayayaanka iyo wakiilada gudbiya cudurrada.*

7. Hilib iyo wax soo saarka dheef xoolaad ka soo jeedda, ee loola jeedo in dadku quuto, kuna haboon in la cuno, ayaa loo ogolaandoonaa in la dhoofsho- waxaana la raacindoonaa shahaadad caalami oo caafimaadintooda ku saabsan, taasoo waafaqsan Nidaamka iyo qaabka uu ansixiyey OIE,

## <u>CUTUBKA 3.4</u>
## Gaadiidka

### Qodobka 3.4.1
### Rararka iyo Dejinta Xoolaha

b) Xoolaha waa inaan la rarin illaa dhamaan arrimaha caafimaadkooda looga baahan yahay iyo wax kale ee dokumenti ah ee lagama maarmaan ah illaa la hello oo uu soo dhameys tiro mas'uulka caafimaad xoolaad oo lagu kalsoon yahay.
t) Rarista xoolahu waa inay noqotaa mid hambsami leh, taasoo abuuri karta khatarta ugu yar, taasoo bilaabmi karta muddo aad ugu dhaw waqtiga bixitaanka ee suurtagalka.
u) Rarista xoolaha waa inuu hubiyaa mas'uulka caafimaadka xoolaha oo lagu kalsoon yahay [Tusaale- hubiyaha qaabka rarista xoolaha] wixii tan dhaaf ah waa in la hubiyaa iyo haddii la helo xoolo aan ku habooneyn inaaney safar geli Karin waa in laga reebaa.

### Qodobka 3.4.2
### Rarka Xoolaha Dhoofaya:-

1) dhamaan gaadiidka, Doonyaha iyo weelka ee xoolaha u kala qaadaya dalka gudihiisa ama dibediisa marka lagu daro ogolaanshaha sharciga ah, waa inay ka heystaan ruqsad uu bixiyey maamulka c/xoolaha, ruqsadaas waa inay ku cad yihiin tiradda xoolaha ay qaadi karaan gaadiidkaas gaarka ahi sida waafaqsan xeerka uu dejiyey maamulka c/xooluhu iyadoo la fulinaayo heerka caalamiga ee deryeelka xoolaha.
2) Sagxadaha baabuurta ama khananka {Raararka ee loo isticmaalo gaadiidka xoolaha waa inay u sameysnaadaan hab ay iska xejinayaan miisaanka xooluhu si loo badbaadiyo loona daryeelo xoolaha muddada ay socdaalka ku jiraan, iyo in ay u fududaato shaqada raacigu.
3) Weelka xoolaha qaada, sida Maraakiibta, Doonyaha, Baabuurta ee xoolaha qaadaya Iwm, sagxadahooga waa in la dhigaa caws googol, leeyihiina hawo, laydh, biyo cabitaan, qashin-saarayaal ay dhiriqdu ka baxdo, dariiqyo looga adeego xoolaha, Weelkasta wa inuu sitaa caws iyo biyo ka badan ka xooluhu u baahan yihiin, Si haddii weelka dhibaato gaadho ama la soo celiyo lagu badbaadiyo xoolaha. Weelkasta waa inay la socdaan Xaraasiin {Raaci} ku filan, daryeelka xoolaha, sida ku cad xeerka maamulka caafimaadka xoolaha isla markaasna ay waafaqsan tahay nidaamka ee Dalkan Somaliland ama ka O.I.E ee caalamka

4) Markasta oo loo baahdo in la nadiifiyo weelka xoolaha waxa laga maarmaan ah in la ilaaliyo inaanu cudur ka fidin ama ka dhalan bakhtiga, dhiriqda iyo qashinka kale lana raaco xeerka caafimaadka xoolaha iyo Qawaaniinta deegaanka sida uu xusayo maamulka caafimaadka xoolaha

5) Neefkasta oo xoolo ah wa inuu hela meel ku filan, loona kala saaraa xoolaha sida ay noocyadooda u kala duwan yihiin. sida Lo'da geesaha leh inaan meel lagula rarin ta aan geesaha lahayn.

6) Xoolaha la raro wa in la siiya calaf iyo biyo ku filan xiliga ay badda sii socdaan waxaana la siinayaa sida ku cad halkan maalin kaste sida uu u qeexayo heerka caalamiga ee baahi maalmeedka ugu yar.

| No. | Xoolaha (neefkiiba) | Biyaha | Calafka |
|---|---|---|---|
| 1 | Geela | 50 liter | 12 kgs |
| 2 | Lo'da | 40 liter | 8 kgs |
| 3 | Adhiga | 5 liter | 2 kgs |
| | | | |

**7. KU RARIDA XOOLAHA GAADIIDKA BADDA**

B. Waxa xoolaha lagu rari karaa dusha sare ee dheega gaadiidka badda iyadoo loo samaynayo xeryo xidhan, raali galin karana dhakhaatarka caafimaadka xoolaha ee Dekeda
T. Xoolaha waa lagu rari karaa dheega hoose hadii jooga ay u baahan yihiin ay leedahay meesha xoolaha lagu rarayo
J. Xaga u saraysa ee gaadiidka badda waa lagu rari karaa xoolaha haddii gaadiidkaasi leeyahay dayr ka dheer hal meter .
X. Maraakiibta xamuulka ah looma isticmaali karo qaadista xoolaha illaa ay ka helaan ogolaansho gaar ah wasiirka xanaanada xoolaha
Y. Gaadiidka badda ee ku haboon xoolo qaadista iyo kuwa xamuulka ah ee ka haysta wasiirka fasax gaar ah waa inay haystaan shahaado cadaynaysa inay badda mari karaan.

**Qodobka 3.4.3**
**Duruufaha la xidhiidha habka rarka:-**

1. **Xoolaha la lugeysiiyo**

a) Xoolaha la lugeysiinaayo, waa inay wadaan raaci, wax garad ah oo khibrad u leh lugeysiinta iyo gadh-wadayaal aqoona u leh wadooyinka, iyadoo uu tilmaamayo dhakhtar u awood leh.

b) Xooluhu inta ay lugeynayaan, wa in la siiyo fursad ay ku daaqaan, lana quudiyo, lana waraabiyo ugu yaraan maalintii hal mar

**2. Gadiidka dhulka**

a) Xoolaha la raro neefkasta wa inuu helo meel ku filan oo uu istagaana, fadhiistana, sida u qeexayo xeerka maamulka caafimaadka xoolaha isla markaasna waafaqsan yahay xeerarka caalamiga.
b) Baabuurta laba raarka ah ee xoolaha qaadka waa inay ka digtoonaadaan illaaliyaana inaan ay xoolaha sare kuna saaloon, kuna kaajin kuwa hoose
c) Darawaliinta wada Gaadiidka sida xoolaha waa inay xil iska saaraan daryeelka xoolaha, waxaana lagula dhaqmi doonaa nidaamka uu qeexayo xeerku.

**3. Gaadiidka Badda**

**a) Bedka loo baahan yahay.**

Cabirka bedka looga baahan yahay in lagu raro xoolaha la dhoofinayo waa sidan soo socota.

| | | |
|---|---|---|
| **Adhiga** | **balaadhka** | **hal mitir** |
| **(4tii neefba)** | **Dhererka** | **hal mitir** |
| | **Joogga** | **hal mitir** |
| **Lo'da** | **Balaadhka** | **0.9 mitir** |
| **(nefkiiba)** | **Dhererka** | **1.5 mitir** |
| | **Joogga** | **1.60 mitir** |
| **Geela** | **Balaadhka** | **hal mitir** |
| **(neefkiiba)** | **Dhererka** | **2.5** |
| | **Joogga** | **3 mitir** |

**b)** Xoolaha lagu raro gaadiidka badda, wa inay sitaan calaf iyo biyo siyaado ah oo lagu badbaadiyo xoolaha haddii gaaddiidka jabo, dib u dhaco, la soo celiyo, ama ay ku dhacaan duruufo aan la filayn.

**c)** Xoolaha waa in loo raro sida ku cad Xeerka maamulka caafimaadka xoolaha lagana ilaaliyo xaalada qalafsan ee cimilada iyadoo si taxadir leh weelka loo hubiyey sida uu qeexay xeerka maamulka c/xoolaha.

4**. Gaadiidka Hawada**

a) Xoolaha la saaro dayuuradaha hawada mara, wa in loo raro, sida ku cad shuruucda xoolaha nooloo ay dejisay Ururka Caalamiga ee Gaadiidka Hawada {IATA}, ee uu ansixiyey O.I.E.

b) Hawlgalka caafimaadka xoolaha, baadhista dheecaanada, tallaalka iyo shahaadada caafimaadka wa inay noqdaan kuwa la dhameystiray ka hor muddada bixitaanka xoolaha.

c) Haddii muddada xooluhu hawada ku jiraan ay ka badantahay (6) lix saacadood, waxa qasab ah in ay dayuuraddu siddato qalabka lagu siiyo xoolaha calafka iyo biyaha.

d) Haddii xoolo ku sii dhintaan dayuuradda, waxa sharci ah in la sii ogeysiiyo masuulka madaarka dayuuradu ku Degayso ka hor intaanay fadhiisan

## CUTUBKA 3.5
## Sadho ka leynta,Dulin dilidda iyo tabaha kale

### Qodobka 3.5.1

**Maamulka caafimaadka xooluhu waa inuu asteeyo qaababkan:-**

1. Qaabkaa sadho ka leynta dhismayaasha iyo meelaha lagu hayo ama la geliyey xoolalaha qaba cudurka faafa.
2. Qaabka Nadiifinta iyo sadho tirka sayladdaha, meelaha xaraashka ah gaadiidka,xeryaha, waababka tareenada iyo wixii kale ee xamuul ah.
3. Sadho ka tiridda xoolaha ku darsamey xoolo qaba cuddurrada faafa ama galey goob sadheysan.

## Cutubka 3.6
## Dhakhtarka raacaya xoolaha dhoofaya

### Qodobka 3.6.1

1. Shixmadda xoolaha dhoofaysa ee aanay lasocon dhakhaatiirta xooluhu hawlwadeenada caafimaadka xoolaha xirfada u leh, waa in ay raacaan tiro xaraasiin (raaci) tababaran oo ku filan ooyna caddeeyeen maamulka c/xoolaha.

**2. Raaciga ama xaraasiinta**

a. Waa inay ilaaliyaan xaaladda guud ee Caafimaadka Xoolaha ee shixmadda

b. Waa in ay hubiyaan siinta calaf iyo biyo, caws-gogol & kaalmadda Daryeelka caafimaad ee ay u baahdaan.

c. Wa inay hubiyaan in xooluhu helaan hawo ku filan.

d. Safarkasta wa in uu qoro warbixin ku saabsan wixii cudur dhacay, dhaawac- yadda dhimashada, daweynta iyo inay si deg-deg ah ugu soo gudbiyaan mas'uulka maamulka caafimaadka xoolaha ee u xil saran.

## CUTUBKA 3.7
## Ruqsadda Gaadiidka

### Qodobka 3.7.1

1. Gaadiid xoolo ma qaadi karo haddii aanu ruqsad ka haysan Maamulka Caafimaadka Xoolaha.

2. Haddii gaadiidku yahay baabuur waa in xaqlaha baabuurku u soo qortaa arji kuna soo Cadeeyaa sida maamulka caafimaadka xoolaha.:-

   - Inta neef ee uu qaadi karo tanka baabuurka (Muga) Iyo wixii macluumaad ah ee kale sida noociisa, raar ama rarkiisu inta ay yihiin ee uu u baahan yahay maamulka caafimaadka xoolaha.
3. Haddii Gadiidku yahay ka badda iyo cirka, Arjiga waxaa la soo raacinayaa sawir-naqshadeedyo iyo macluumaad la xidhiidha qaabka dhismaha qalabka, shaqaalaha iyo tanka weelka.
4. haddii Maamulka Caafimaadka Xooluhu ku qanacdo ama garawsado marka ay hubiyaan weelka ama gaadiidka, waxaa la siin doona gaadiidka Ruqsad, sannad ah, lana jadiidiyo sannadkasta, haddii gaadiidka dhismihiisa wax laga beddelo mar labaad ayaa arji danbe la soo qoranayaa iyadoo ku soo xusey wixii isbeddelo ah taasoo lagama maarmaan u ah ka hor inta aan ruqsadda la siin.

## CUTUBKA 3.8
## Habraaca shahaadada

### Qodobka 3.8.1

Diyaarinta shahaaddada Caafimaadka Xoolaha ee Caalamiga ah..

1. Sammeynta shahaadada wa inay waafaqsan tahay habka O.I.E.
2. Shahaadadu waa in ay noqotaa mid hore loo sii daabacay, lehna lambar taxan, la khiyaamayn karin, ka dibna uu saxeexo dhakhtar u xilsaaran sida dhakhaatiirta dekedda.

3. shahaadadu waa in ay ku qoran tahay af adduunka ogolyahay ama caan ku ah hadii dalka xoolaha loo dirayaa aanu diidaneyn.

4. wixii dib-u sixid lagu sameeyo qoraalka ku yaal shahaadada, waa in meesha shaabad la saaraa uuna saxeexaa dhakhtarka u xil saran.

5. Waa inay dhakhaatiirtu ku ixtiraaman yihiin shaqada ay hayaan.

**Qodobka 3.8.2**
**Dhakhaatiirta Wax Saxeexda:-**

1. waa inay yihiin kuwo maamulka caafimaadka Xoolaha ka diiwaan gashan, liisanna u leh shaqada xoolaha, una leh aqoon baadhista caafimaadka xoolaha iyo saxeexida shahaadada, khibradna u leh shaqada ugu yaraan 5 sanno iyo inuu maamulka c/xooluhu u awood siiyey.
2. Waa inaanay saxeexin shahaadad banaan ama aan dhamays tirnayn oo khusaysa xoolo ama wax soo saarka xoolaha oo aanay hubinin amaba ka baxsan masuuliyadiisa.
3. Waa inay hubiyaan shaahaadaddu inay sax tahay ooy dhantahay inta aanay saxeexin.

4. waa inaaney dan dhaqaale ka yeellan aanka ahayn khidmadda u adeegista shahaaddada ay saxeexayaan ee xoolaha ama wax soo saarka xoolaha

**Cutubka 3.9**
**Sheybaadhista Tijaabooyinka Loola Jeedo Ganacsiga Adduunka**

**Qodobka 3.9.1**

a) Dhamaan shaybaadhista, tijaabooyinka, looga dan leeyahay, ganacsiga adduunka ee xoolaha, wax soo saarka xoolaha, waa in la waafajiyo shuruucda O.I.E si looga hortego wax khilaaf ahi, inay ka soo baxaan natiijooyinka go'aanaddaas, dalka loo dhoofshahu.

## (QAYBTA 4AAD)

**Awood Bixinta Tilmaamaha & Qoraalka Shuruucda Ah Ee Dhoofinta/Soo Dejinta & Gacan ku heynta Cuduradda**

**<u>CUTUBKA 4: 1</u>**
**Tixgelinta Guud**

**Qodonka 4.1.1**

1. Maamulka Caafimaadka xoolaha waxa ku jira Wasiirka, AG/ Guud, AG/Waaxda Caafimaadka Xoolaha iyo heer laameedka maamuleed ee Caafimaadka xoolaha & Aqoonyahanada cilmiga Xoolaha.

2. Qaabdhismeedka, Golaha Qaranka ee Caafimaadka/Xoolaha Adeegyada Caafimaadka/Xoolaha ee madaxa banaan waxay iskaashi la sameyn doonaan Maamuladda Caafimaadka xoolaha si ay ugu adeegaan si wax qabad fiican, wax tar leh, si suubana ugu shaqeeyaan hawlaha shaqadda u adeegga xoolaha.

3. Wasiirku waa halka u sareysa ee nidaamka dawliga ee maamulka Caafimaadka/Xoolaha, iyo isagoo ka masuul ah, gebi ahaan adeegyada Caafimaadka.Xoolaha iyo wixii shaqooyin ah ee la xidhiidha.
4. Wasiirku wuxuu wareegto wakiil ahaan ugu dirsan karaa mid kasta oo ka mid awoodaha amaba shaqooyinka uguna magacaabi karaa isagu/iyadu kuwaasoo kuyaalla sharciyadda AG/Guud, AG/Waaxda Caafimaadka Xoolaha amaba Madaxa Qaybaha ee Waxool amaba Hey'adda Madaxa Banaan amaba dhismayaasha loo asaasey inay qabtaan hawlo mucayin ah.

## CUTUBKA 4:2
## Awoodda Bixinta Tilmaamaha

### Qodobka4.2.1

Wasiirku kadib markii uu la tashaday Agaasimaha Guud iyo Agaasimaha Waaxda Caafimaadka & Horimarinta Xoolaha, wuxuu wareegto ku soo saari karaa:-

1. Wuxuu mamnuucid in muddo ah ku sameyn karaa haddii isagu/iyadu u maleeyo inay lagama maarmaan tahay, amaba uu sharciyeyn karo, dhoofinta iyo soo dejinta dhamaan xoolaha amaba nooc khaas ah oo xoolaha ka mid ah ama hilibka Qallan, Hilibka, Cuntooyinka kale ee laga helo xoolaha, Hargaha. Saamaha, Suufka, Bacriminta Dhiriqda mannida, Dheecaanka, Talaalka & wixii kale ee soo saarista Biyoolejiyada iyo Kiimikadda ah. Kuwaasoo loola dan leeyahay sidii lagu xakameyn lahaa

   Cuddurada Xoolaha ee loo dhoofinayo amaba laga soo rarayo wadan khaas ah, Dekad ama Dal/Degaan.

2. Qorista waqti illaa waqtigaa, muddada takoorida, amaba tallaabooyinkaa u khaaska ah sugidda caafimaadka xoolaha dhoofaya.
3. Asaaska habraaca rasmi ah oo lagu awoodsiinayo dhakhaatiirta saxeexeysa shahaadooyinka Caalamiga (Tusaale ka ay khuseyso ee u xilsaaran sida dhakhtarka Caafimaadka xoolaha ee Dekedda) laguna qeexay waajibaadkooda iyo doorkooda.
4. Aasaaska marka lala tashado Golaha Qaranka ee Caafimaadka Xoolaha, habraac rasmiya ah oo awood siinaya dhakhaatiirta Madaxa banaan ama Hay'ado fulinaya hawlo Dawli ah.
5. Aasaaska qaybo seerayaal & seeryaasha kale ee ujeeddadeedu tahay xakameynta cudurada sida waafaqsan tilmaamaha O.I.E iyo bixinta Awaamiirta, kuwaasoo saameyn ku yeelan kara Goobta sadheysan, marka lagu daro waxyaalaha ku qoran xeerka.
6. Soo saaridda tilmamo loo adeegsado farsamooyinka iyo dariiqooyinka, war isdhaafsiga ee fuddudeynaya la xidhiidhka ururada caalamiga ah (

**FAO WHO, OIE, WTO,** Iwm) iyo sheybaadha caalamiga ah iyo kuwa Goboleed.

7. Astaynta iyadoo la raacayo, tixgelinayo soo jeedinta Golaha Qaranka ee caafimaadka xoolaha iyo shaqo wadaaggeda kale,khidmadda loo adeeguhu bixinayo amaba khidmaddo kale oo la xidhiidha wax alla wixii addeegyo kale, ee uu dhigayo xeerkani.

8. Asaaska habraac maamul oo rasmi ah iyo soo saarista Awaamiir ku taxaluqa soo dejinta, Maamulidda iyo Isticmaalka tallaalada iyo biyoolojiyada kale.

**Qoddobka 4-2-2**

1. Agaasimaha Waaxda Caafimaadka & Horimarinta Xoolaha wuxuu leeyahay awaamiirta, marka uu ansixiyo Agaasimaha Guud, ee ku socda maamulka Dawliga ee Caafimaadka Xoolaha, Sarkaalka caafimaadka xoolaha, kormeeraha kawaanka amaba dhakhatar (mid dawli ah & mid kale oo iskii u shaqeystaba) dhamaan amaba mid ka mid ah arrimahan soo socda:-

    a) Soo bandhigidda warbixinta loo baahan yahay ee uu Agaasimuhu u maleeyo inay ku haboon yihiin haddii ay jiraan wax cudurro xoolaad ah, amaba looga shakiyo inay ka jiraan goobaha iyo sida khaaska ah ee xaaladda warbixinta loo gudbiyey

    b) Xaqiijinta wixii tallooyin dhaxalgal iyo kudhaqan leh ee uu Agaasimuhu u maleeyo inay lagama maarmaan u tahay ka hortegga & kaantaroolka cuddurrada faafa.

    c) Fullinta wax alle iyo wixii kale ee awaamiir ah ee uu isagu/iyadu ee khibrad ahaan, isla markaasna uu hirgeliyo wixii lagama maarmaan ah ahmiyadeeduna tahay xakameynta cuduradda iyo inay ka mid tahay shuruucda uu maamulka caafimaadka Xooluhu bixiyey.

**Qodobka 4 -2-3**

1. Maamulka Caafimaadka Xooluhu, Dhakhaatiirta kormeerayaasha caafimaadku iyo cid alle ciddii dhakhaatiir kale ee loo awood siiyey waxay geli karaan wixii kasta ee dhul, dhisme, xero, xamuulka xoolaha qaada, iyo wixii kale ee lagu guri karo, amaba lagu qaadi karo.

a) Xoolaha baadhista oo isku mid ah iyo wax alle wixii kasta ee lagu raadinayo ahmiyadeedu tahay hubinta inay xoolahaasi qabaan cudduradda faafa amaba ay tahay in sidoo kale loo xaqiijiyo inay waafaqsan tahay (Xeerkan) sida nadaafadda, ka illaalinta jeermiska & qaabdhismeedka & qalabkaasi in si fiican loo mariyey.

b) Hilibka qallan, Hargaha & wixii kale ee laga helo xoolaha, baadhistoodu waa isku mid, taasoo cadeynta iyo garashada cuduraddaasi amaba ahmiyadoodu tahay hubinta inay ku jirto & in kale (Xeerka) & sida ay tahay nadiifinta & ka

illaalinta jeermiska ee qaabdhismeedka & qalabkaasi in si fiican loo soo sameeyey.

2. Maamulka Caafimaadka Xoolaha, kadib ansixinta Agaasimaha Caafimaadka Xooluhu wuxuu bixinayaa tilmaamo uu isagu/iyadu ku xaqiijinayo wixii tallaabooyin ah ee khuseeya cafimaadka xoolaha ee Goobtaasi xadeysan taasoo isaga/iyada ka soo baxday iyo inay ku tilmaaman tahay laguna bixiyeyXeerkan.

**<u>CUTUBKA 4 – 3</u>**
**SHURRUC QORISTA**

**Qodobka 4 – 3-1**

- Maamulka Caafimadka Xooluhu wuxuu soo qorayaa shuruucda ku jiheysan xoolo dhoofka, soo dejinta iyo ka illaalinta Cuduradda iyo siday u waafaqsantahay, waxyaalaha laga rabo dalka loo dhoofiyo iyo sida qaabka guud ee tilmaamaha O.I.E, kadib marka uu qaato cidda kale ee shaqo wadaagtu ka dhaxeyso.

# QAYBTA 5aad (Section)

**Caafimaadka Xoolaha Ee Madaxa Banaan**

**Cutubka 5.1**
**Kala soocidda xillalka Qaybaha Dawliga iyo kuwa iskood u Shaqeysta**

**Qodobka 5.1.1**

1) Waa in waaxda caafimaadka xoolaha ee Dawladu ay sugtaa caafimaadka xoolaha qaranka, waxeyna u xilsaarantahay gaadhsiinta ama dhameystirka adeegyada hawlaha caafimaadka xoolaha ee dalka .iyada oo laga duulayo siyaasda guud ee Qoranka ee ku wajahan horumarka dalka kuna saleynsan maalgalin, u sinaanshaha fursadaha wax-ka qabashada saboolnimada, Isku-filnaanshaha, Ilaalinta Deegaanka iyo kuwa kale ee leh ahmiyad guud,

2) Iyada oo lagu saleynaayo xaaladaha jira/taagan ee dhaqaalaha bulshada, xulasha hadaba xoolaha, haddii ay jiraan wax awooda ka baxsan, shuruucda iyo nidaamka caalamka, Dowrka iyo shaqada ey kala leeyihiin dawlada iyo Ururada madaxa banaan ee caafimaadka xooluhu waxay u kala qeexanyihiin sida soo socota.

**a) Adeeggyada caafimaadka xoolaha ee hoos imanaya Qeybta Dawliga ah wuxuu noqonayaa**

1. hubinta/illaalinta cudurrada iyo dabagalkooda.
2. U Gudbinta warbixinta Hay'adaha caalamiga ee urruradacaafimaadka ku lugleh iyo wadanada kale.
3. Xakameynta iyo ka-hortaga cudurada xoolaha ee liiska OIE, oo ay ku jiraan Talaalka iyo xakameynta cudur gudbiyaasha.
4. Baadhista cudurada, warbixinta iyo caddeymaha.
5. Qorshe ku talagal leh iyo wax qabad deg deg oo laga geysto cudurrada.
6. Illaalinta nadaafada cuntada iyo caafimaadka Dadweynaha.
7. Baadhista iyo cadeynta caafimaadka waxa dhoofiya iyo wax soo degeya waafaqsan si shuruucdacaalamiga ah.
8. Hubinta/sugida tayada daawooyinka xoolaha, tallaalada iyo wixii kale ee Biyoolojikeda la soo saaro.
9. Tababarada caafimaadka xoolaha, cilmi baadhis, fidin iyo horumarin.
10. Dajinta shuruucda maamul, dabagalka iyo gacan siinta Hay'ada caalamiga ee ku hawlan daryeelka caafimaadka xoolaha.

**b) Adeegyada caafimaadka xoolaha ee hoos yimaada qeybta iskeed u shaqeysata:-**

- Arimahan hoos ku qoran waxaa qaban kara dhakhaatiirta xoolaha ee madaxa banaan

1. daaweynta xoolaha.
2. waxaa siin kara qandaraasyo hayadaha dawlada iyo kuwa ajnabiga ah marka ay ogalaansho ka helaan wasaarada xanaanada xoolaha.
3. haday ka qaataan qandaraasyo hayadaha ajnabiga ah waxay u qori karaan. warbixin la xidhiidha hawsha ay qandaraaskaas oo kaliya ku qaateen iyagoo warbixin toos ah siinaya wasaarada xanaanada xoolaha.
4. Dhakhaatiirta madaxa bannaan ee qabanaya hawlaha caafimaadka xoolaha waa inay ka diwaan-gashan yihiin laysan ay ka haystaan wasaarada xanaanada xoolaha.
5. Dhakhaatiirta madaxa banaani waa inay warbixin joogta ah oo la xidhiidha hawlahooda caafimaadka xoolaha siiyaan wasaarada xanaanada xoolaha.
6. Adeegayada, baadhista iyo daaweynta cudurada.
7. Soo dajinta, qeybinta iyo iibinta daawooyinka xoolaha, iyo Qalabkooda
8. Maareynta ka ganacsiga wax soo saarka xoolaha.

3. Iyada oo la eegayo marxalada horumarinneyd ee qaybaha iskood u shaqeeysta iyo hay'adaha sharciga qeybta nadaamka qaabka shaqo ku dhisan, shaqooyinka gaarka ah ee ku xusan, masuuliyda waaxda Dawlada ama Wasaarada ee ku xusan weedha hore ee (2) waa loo wakiilan karaa ama lagu siin kara hab-qandaraas, qaybta iskeeda u shaqeysata, halka qeybta Dawliga ah ee caafimaadka xooluhu uu illaalinayo shuruuc dooda iyo xakameyntooda.

4. Hawlaha ama addeegyada caafimaadka xoolaha, qandaraaska lagu siin karo, qeybaha Madaxa-banaan sida ku xusan weedha sedexaad (3) waa qaar lagu

tartami karo/ama gali-kara tartan. Taasi oo macnaheedu yahay, Dhakhtarkasta ama Urur Dhakhaatiirta ee madax banaan oo haysta ama leh wixii khibrad iyo kartida, gudashada hawlaha caafimaadka xoolaha sida Aqoon, Waayo aragnimo iyo Imkaaniyaad, Waxa maamulka caafimaadka xooluhu, u wakiilan karaa fulinta hawlaha, caafimaadka xoolaha, habka uu Maamulka Caafimaadka Xooluhu u dajiyey fulinta hawlahaas.

5. Maamulka caafimaadka xooluhu wuxu ka dhigi doono, hawlaha caafimaadka xoolaha inta badan wax lagu tartamo ilaa inta suurtogal iyada oo loo wakiilanaayo hawlahaas caafimaad xoolaha Ururada madaxa banaan, ee caafimaadka xoolaha. Waxa kale oo maamulka caafimaadka xoolaha ee dawladu ku gaadh siin doono hawlaha shaqada Adeega caafimaadka inta suurtogal ah nidaam iswadi kara/kharashkana bixin kara sida uu habku qeexaayo.

6. Waa in maamulka caafimaadka Dawladu u abuuro/Suurtogaliyo Ururada madaxa-banaan ee caafimaadka xoolaha jawi haboon oo ay horumar ku gaadhi karaan, kaa soo ah mid waafaqsan talooyinka ka soo fula golaha qoranka ee caafimaadka xoolaha, kuwaas oo matali kara danaha Dhakhaatiirta madaxa banaan iyo ururkooda ama Hay'adooda.

## CUTUBKA 5.2

## Madax-Banaanaynta Adeegyada Caafimaadka Xoolaha iyo Shaqooyinka Rasmiga Ah.

1) Sida ku cad Cutubka 5.1 ee qeybta (5.1) dhakhaatiirta iskood u shaqeysta diiwaangashan ee liisanka leh waxa qandaraas lagu siin karaa in ay fuliyaan shaqooyinka rasmiga ah kuwaas ay ku jiri karaan arrimaha caddeymahu(shahaadada) caafimaadka iyaga oo ka wakiil ah maamulka caafimaadka xoolaha.

2) Waa in si cad loo kala saaro loona dejiyo doorka ay kala leeyihiin qeybaha iskood u shaqeysta iyo kuwa dawliga ee shaqooyinka lagu qandaraas siiyey, hawlahaas waa in ay si cad ugu qeexanyihiin qoraal kaaso qeexaya habka ay kala leeyihiin sida ku cad qormadan dhakhaatiirta iskood u shaqeysta, iyo maamulka caafimaadka xoolaha.

a) Dhakhaatiirta Madaxa banaan waxay hoos imanayaan maamulka Caafimaadka xoolaha marka shaqo loo wakiisho. Halka Maamulka Caafimaadka Xoolaha ee Wasaaradu uu u xilsaaran yahay hubinta kormeerka hawlaha ay fulinayaan dhaakhatiirta madaxa banaani, taaso xaqiijinaysa madax-banaanidooda, xilkasnimadooda iyo eexasho la'aanta ama uheelanaantooda.

b) Lacagta laga siinaayo dhakhaatiirta madaxa-banaan shaqada ay guteen/qabteen, waxa bixin doona oo kaliya maamulka caafimaadka xoolaha ee Wasaarada. Dhakhaatiirta madaxa-banaan, si toos ah ulama xidhiidhi karaan mas'uulka wax soo saarka amaba adeegyada la qabtey.

c) Dhakhaatiirta madaxa-banaani ma yeelan karaan damac dhaqaale lacageed ama dano kale oo ka baxsan shaqada Adeega Xadidan ee loo wakiishay.

d) Farsamadda xumida amaba faldembiyeedka ay sameeyaan dhakhaatiirta madaxa-banaan waxa loo furi kara **maxkamad kiis madani ah,** ama mid ciqaab ah, cunaqabateyn maamul, oo ay ku soo rogaan maamulka caafimaadka xooluhu, taasi oo noqon karta in lagala noqdo xilkii lagu aaminay iyo cunaqabatayn farsamo oo ay ku soo rogaan Guddiga Qaranka ee caafimaadka xooluhu **(N.V.B)** oo waafaqsan xeerkani.

**c)** Karaamada iyo xilkasnimada dhakhaatiirta fulinaaya shaqooyinka rasmiga waa in maamulka caafimaadka ku qadariyo kuna illaaliyo si waafaqsan talooyinka Golaha Qaranka ee caafimaadka xoolaha.

## <u>CUTUBKA 5.3</u>

## 2) Aasaasida Golaha Qaranka ee Caafimaadka Xoolaha (GQCX)

### Qodobka 5.3.1

1) Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland wuxuu magacaabaya madaxa Golaha Qaranka ee Caafimaadka Xoolaha (N.V.B), iyada oo laga duulayo talobixinta Wasiirka Wasaarada Xannaanada Xoolaha.

2) Golaha Qaranka ee Caafimaadka Xooluhu wuxu ka koobanyahay xubnaha soo socda.

a) Dhakhtar diiwaangashan oo leh liisan (Veterinarian) oo ay soo doorteen golaha dhakhaatiirtu ee Somaliland in uu noqdo Gudoomiyaha Golaha Qoranka ee Caafimaadka xoolaha (N.V.B).

b) Agaasimaha waaxda caafimaadka xoolaha oo noqon doona diiwaan hayaha.

c) Hal dhakhtar caafimaad oo diiwaangashan oo leh liisan ama hal dhakhtar xanaano oo ku jira maamulka caafimaadka xolaha.

d) Hal dhakhtar oo diiwaangashan u leh waayo aragnimo la xidhiidha maamulka iyo baadhista daawooyinka xoolaha ama dhakhtar takhasus u leh daawooyinka oo ka tirsan dhakhaatiirta madaxa-banaan ka dib marka ey doortaan dhakhaatiir diiwaangashan ama Urur dhakhaatiirta madaxa-banaan sida ku qeexan habka shuruucda ee ku qoran xeerka, Dhakhtarka diiwaangeshan oo leh waayo aragnimada daawooyinka ama farmashiiste waa in uu yahay mid aad ugu dhex jira ganacsiga daawooyinka.

e) Hal xubin sharafeed ah oo magacaabistiisa ka talo bixiyo Wasiirka Wasaarada Xanaanada Xoolaha.

## Qodobka 5.3.2

## Shaqaalaha Xafiiska Golaha Qaranka ee caafimaadka Xoolaha (GQCX) Waxa ka mid ah.

a) Gudoomiyaha.
b) Diiwaanhayaha.
c) Xoghaya laga soo magacaabay Golaha Qaranka ee Caafimaadka Xoolaha (GQCX) dhexooda kana hoos shaqeyn doona diiwaanhaya, kaaso ka masuul noqon doona arrimaha maamulka la xidhiidha.

## Qodobka 5.3.3

## Mudada xubnaha Golaha Qaranka ee Caafimaadka Xoolahu hayn doonaan xafiiska :

a) Xubnaha Goluhu, waxay hayn doonaan xafiiska muddo 3 sanno ah hase yeeshee dib baa loo soo magacaabi kara.

b) Xubin walba oo ka tirsan Golaha aan ka aheyn xubin dibbeda way iska casili kartaa xafiiska marka ay la haboonaato, wuxuna u gudbinayaa qoraalkiisa Wasiirka Xanaanada Xoolaha. Laga soo bilaabo taariikhda Wasiirku helo qoraalkaas, xubintu kama tirsana Golaha (GQCX)

c) Madaxweynaha, isaga oo ka duulaya talobixinta Wasiirka W. X. Xoolaha, wuxu magacaabi karaa Dhakhtar diiwaangashan ama qof ku haboon jagadan si ku meel gaadh ah, xubinta kasta oo ka tirsan Golaha Qaranka Caafimaadka xoolaha haddii ay dhacdo:-

1) In uu dhinto.
2) Ruqseysto.
3) Dalka ka maqanyahay.
4) Awood daro.

d) Hawlwadeenada xafiiska Golaha (Gudoomiye, Diiwaanhaye iyo xoghaynta), waxay gudan doonaan shaqada ay ku cayimanyihiin ee la xidhiidha xillalkooda iyo golaha qaranka ee caafimaadka xoolaha & sida uu asteeyo maamulka caafimaadka xooluhu.

### Qodobka 5.3.4
### Shirarka Golaha (GQCX)

a) Golaha wuxuu fadhiisandoona ugu yaraan hal mar sadexdii biloodba. Hase yeeshee kama reebana in u yeesho fadhi hadii loo arko daruuri waqtigaasha qaarkood.

b) Gudoomiyaha wuxuu noqonayaa shirgudoonka shirarka Boodhka marka uu maqanyahayna, waxay xubnaha Golaha shirkaas fadhiya waxay ka dooranayaan Gudoomiye taaso waafaqsan nidaamka u degsan doorashada Gudoomiyaha ee shirkaas.

c) Kooramka Golaha waa shan xubnood ama tirada xubnaha shirku ku qabsoomi karo ee go'aan ka fuli kara waa (5) xubnood.

d) Go'aanada ka soo fula Golaha wuxu noqon doonaan mid aqlabiyad ku saleysan.

e) Wixii laga hadlo shirwalba, waa in si habsami leh loo xafido, waa in uu Gudoomiyo ansixiyo ka hore inta aanan shirka ku xigaa qabsoomin.

**Qodobka 5.3.5**
**Awooda iyo shaqada Golaha (N.V.B) ay leeyihiin**

1) Iyada oo la raacayo shuruucda ku jirta xeerkan (Code) caafimaadka xoolaha, wuxu Goluhu awood u leeyahay diiwaangelin iyo katiridda diiwaanka dhakhaatiirta caafimaadka xoolaha, kuwa farmasiyada Daawada xoolaha, kaaliye caafimaad iyo dhismaha (farmasiiyada Iwm) sida waafaqsan shuruucda ku qeexan xeerkac.

2) Wuxuu Goluhu qeexaya shuruudaha la siinayo ama laga rabo guryaha, dhismayaasha tayada adeegayada caafimaadka xoolah la qabanayo.

3) Wuxuu Golahu dejinaya nadaamka lagu aasaasayo Ururka qaranka ee caafimaadka xoolaha, wuxuna ogolaanayaa oo isla markaana cadeynaya xeerka iyo shuruucda Ururka. Waxa kale oo uu golahu awood u leeyahay kormeerida hawlaha Ururku qabto iyo sharci sameynta haddii ay daruuri noqoto si kor loogu qaado tayada shaqooyinkooda & kaalintooda.

4) Dib-u-eegis iyo diyaarin xeerka qaranka ee anshaxa dhawrista caafimaadka xoolaha.

5) Hubinta & ku dhaqanka xubnaha oo dhami dhakhaatiir u xirfad leh xeerka anshaxa caafimaadka xoolaha, laguna fulinaayo wixii ciqaab ah ee la xidhiidha khalad ama gaf farsamo sida ku cad xeerka.

6) Soo saarista shuruucda/qawaaniin lagu maamulo adeegyada madaxa-banaan ee caafimaadka xoolaha ee uu maamulka caafimaadku kor ugu qaadayo kuna xakameynaayo hawlahooda.

7) Wuxuu Boodhka gacan ka siiya maamulka caafimaadka ee Wasaarada sameynta,dejinta shuruucda la xidhiidha xeer Wasiir iyo Qawaniinta kale ee **Baarlamanka** laga rabo kuna wajahan caafimaadka xoolaha

8) Inuu gacan ku siiyo Wasaaradda sameynta siyaasada iyo istaratijiyada qaranka ee ku wajahan xoolaha.

9) In ay ka talo bixiyaan oo ay qiimeeyaan tayada nadaamka Waxbarasho culuumta caafimaadka xoolaha ee heer walba.
10) Marka jaran-jarada heykalka la eego. Goluhu wuxuu toos warbixinta u siinayaa Agaasimaha guud ee Wasaaradda Xoolaha kaaso ku shaqeynaaya awaamiirta iyo talooyinka Wasiirka Xanaanada Xoolaha.

## CUTUBKA 5.4

### Magacaabid iyo Doorashada Gudoomiyaha Golaha Qoranka ee Caafimaadka Xoolaha:

### Qodobka 5.4.1

3) Qofka u qalma in loo magacaabo Gudoomiyaha Gudiga Qaranka ee Caafimaadka Xoolaha waa in:-

a) Uu yahay Somali Lander, haystaana Shahaadad Jamacadeed ee caafimaadka ama xanaanada, kana diiwaangashan yahay Golaha Qaranka ee caafimaadka xoolaha (N.V.B).

b) Aanay dadiisu ka yareyn 40 sanno, kana weynayn 60 sanno.

c) Uu u leeyahay waayo-aragnimo xoolaha ama Adeegga caafimaadka xoolaha muddo aan ka yareyn 15 Sanno.
d) Waa in uu leeyahay.

1) Aqoonta xirfada iyo haykalka madaxnimo.
2) Kartida maamulka iyo maareynta mashaariicda xoolaha ama Adeega caafimaadka xoolaha.

e) Uu yahay qof karamo leh, aadna looga danbeeyo/ama sumcad fiican ku leh dalka, lehna waayo-aragnimo waxtar oo ku filan la shaqeynta Hay'adaha & ururada caalamiga.

f) Uu yahay qof aad ugu wanaagsan ku hadalka iyo qoraalka luqada INGIRIISIGA Aqoonta luqada kale oo Ajnabiga ah waxay iyaguna noqon karaan kuwo faa'iido leh.

### Qodobka 5.4.2:

1) Wasiirka ayaa isku yeedhi doona shirweyne (Kongares) ay isugu iman doonaan Golaha dhakhaatiirta Somaliland kuwa Dawliga iyo kuwa madaxa-banaanba, si loo doorto Gudoomiyaha Gudiga Qaranka ee Caafimaadka Xoolaha, Wasiirka wuxu cadeynayaa maalinta shirku qabsoomi doono ka hor mudo an ka yareyn 15 maalmood.

2) Shirweynaha Goluhu (kongareyska) dhakhaatiirta, wuxu qabsoomi kara marka ay joogaan 2/3 dhakhatiirta diiwaangashan

3) Gudiga Doorashadu waxay ka koobnaan doonaa
   a) Xubin sharafeed uu magacaabey Wasiirka oo matali doona Gudoomiyaha komishinka.
   b) Agaasimaha waaxda caafimaadka xoolaha.

   c) Dhakhatar diiwaangashan, kana tirsan qaybha madaxa banaan, oo ey doorteen dhakhatiir diiwaangashan ama ururka dhakhaatiirta qaranka ee caafimaadka xoolaha.

4) Fadhiga ururka kongareyska, dhakhtarka diiwaangashan ee caafimaadka ama xanaanada ah wuxuu magacaabi karaa isaga oo raacaya foomka magacaabista ee wareegga hore kuna xusan foomka 3 xeerkan, tartamaha buuxinaaya shuruudaha looga baahanyahay kuna xusan Qodobka 5.4.1 ee Qormadan "5aad" ee Doorashada Gudoomiyanimada Golaha. Foomka magacaabistu wuxu yeelan doonaa labada magac ee soo jeediyaha iyo tartamaha kuwaas oo ku qoran xarfo waaweyn iyo midwalba saxeexiisa, waa in qofwalba shakhsi ahaan foomka gacanta ka saraa Gudiga doorashada (Kominshanka)

5) Kominshanku (Gudiga) kadib wuxu siindoonaa dhakhtar walba oo qaybta caafimaadka ama qaybta xanaanada ka tirsan warqada cod-bixinta sida ku cad wareega labaad ee foonka 3 ee xeerkan , kaaso oo ey ku qoranyihiin magacyada tartamyaasha lagu soo magacaabay si waafaqsan weedha 4 ee hore (kor ku xusan)

6) Dhakhtar walba oo ka tirsan qaybta caafimaadka ama xanaanada xoolaha oo helo warqada codka waa in uu ku muujiyaa xarafka X. magaca tartamaha ee codkiisa uu siinaayo ama cida u dooranaayo kuna qoro magaciisa/magaceeda xarfo waaweyn, kuna saxeexo warqada codka meesha looga talogaley. Warqada codbixintu haddii aanay laheyn astaamaha cayiman ama wax badan waxa loo macnaysanaya mid xumaatay, lamana texgalinaayo haba-yaraate.

7) Warqadan cod-bixinta waa in qofwalba dib ugu celiyo gudiga doorashada.(doorashada gudoomiyaha) taasoo uu qofkastaaba gacanta ka dhiibayo

8) Isla maalinta doorashada,, Gudigu komishanka waxay tirin doonaan codka tartamawalba helay, ka dib waxay ku dhawaaqayaan qofka helay codka ugu badan ee loo doortay jagada Gudoomiyaha Golaha.

9) Iyada oo Cadaalada cod-bixinta mudnaan la siinayo waxay gudiga doorashada gudoonsanayaan in ay cadeeyaan cida guushu raacday.

10) Gudiga (Komishinka) waxay u gudbin doonaan xubinta tartamaha loo doortay in loo magacaabo Gudoomiyaha Golaha Qaranka ee caafimaadka xoolaha) Wasiirka Wuxu Wasiirkuna ka ansaxin doonaa madaxweynaha inuu si rasmi ah uga magacaabo.

# Cutubka 5.5

**Diiwaan-galinta iyo liisan (Ruqsad)siinta Dhakhaatiirta Farmashiistaha iyo kaaliyeyaasha caafimaadka xoolaha:**

**Qodobka 5.5.1**

**Codsiga is Diiwaangalinta**

1) Qofkasta oo xaq-u-leh in la diiwaangaliyo sida xeerkan qabo, waxan ka dalban karaa diiwaanhayaha in uu diiwaangaliyo.

**Qodobka 5.5.2**

**Yaa ku Haboon in uu dalbo loona Diiwaangalinta Dhakhtar caafimaadka Xoolaha, Farmashista ama kaaliye ahaanba?**

1) Qofkasta oo u qalma in la diiwaangaliyo sida dhakhtar farmashiste ama kaaliye caafimaadka xoolaha waa in:-

   **a)** Uu yahay muwaadin SomaliLander ah oo haysta shahaadada jaamicadeed oo la xidhiidha caluunta caafimaadka, xanaanada xoolaha ama takhasuska culuunta Dawooyinka/farmashiiyada, kana soo qaatay jaamacad oo ay ururka qaranka qaranka ee caafimaadka xooluhu ogolaatay amaba ay aqoonsadeen

   **b)** Muwaadin Somalilander ah oo haysta diblooma ku tacluqa caafimaadka xoolaha/sheybaadhka, kana soo baxay dugsiga cilmiga caafimaadka xoolaha oo ay ogolaatay amaba ay aqoonsadeen **Ururka Qaranka ee Caafimaadka Xoolahu (N.V.B).**

   **c)** Kama reebana qof aan Somalilander ahayn oo buuxiyay shuruudaha kor ku xusan (Ogolaanshahana) ka helay ururka Qaranka ee caafimaadka xoolaha.

**<u>Qodobka 5.5.3</u>**

**Sidee loo dalbanayaa is-diiwaangalinta**

1) Qofkasta oo u qalma in la diiwaagaliyo sida ku xusan qodobka 5.5.2 ee hore wuxu u sameynaya dalabkiisa/Dalabkeeda sida ku qeexan foomka.1/1
2) Foomka cayiman ama tilmaaman waa in ay la socoto:-
    a) Khidmad xadidan oo ku cad wareegto Wasiir oo taageero ka haysta golaha qaranka ee caafimaadka xoolaha (N.V.B)

    b) Shahaada jaamicadeed ama diblooma oo ka marag kacayse in uu u codsadaha aqoontiisa.
    c) Haddii uu u baahdo G.Q ee caafimaadka Qaranka xooluhu(GQCX) waxa la adeegsanayaa qof u marag fura codsadaha in shahaadada ama diblomuhu yahay mid dhab ah ama sharci ah, waxana muhiim in la helo magaca iyo Addresska si loola xidhiidho marka loo baahdo.
    d) Warqadaha laba markhaati oo cadeynaya.

3) Marka codsaduhu buuxiyo shuruucda kor ku xusan, kuna qancay Golaha Qaranka ee Caafimaadka Xoolaha isaga/iyada waxa lagu diiwaangalinayaa diiwaanka waxana la siinayaa cadeynta diiwaangalinta ee ku xusan foomka ½.

**Qodobka 5.5.4**
**Ayaa u Qalma in uu codsado Liisanka?**

1) Dhakhtar walba oo iska diwaan galiyay caafimaadka xoolaha sida ku xusan **qodobka 5.5.3** ee xeerkan oo haysta cadeynta diiwaangalinta oo bixinayaa khidmada (FEE) waa la siinayaa liisanka (Foomka 1/3 ) si uu ugu shaqeysto xirfadiisa la xidhiidha Adeega caafimaadka xoolaha ama dhakhtarnimo.

2) Mar alla marka uu Golahu ku qanco in ay tahay wax danta dadweynahu ku jirta, wuxu **(GQCX**) u talo bixinaya in liisanka la siiyo dhakhtarka aan Somaliland ahayn oo haysta shahaadada Jaamicadeed taaso xaq u siinaysa isaga/iyada in uu xirfada dhakhtarnimo kaga shaqeysto Dalka.

**Qodobka 5.5.5**
**Sidee loo codsadaa Liisanka**

1) Arjiga/Dalabka liisanku waa sida ku cad foomka ¼ waana in lagu bixiyo shuruudaha ay ka mid yihiin:-

    a) Bixinta lacagta khidmada (VII).
    b) Haysashada cadeynta diiwaan-galinta.
    c) Cadeynta shahaadada caafimaadka xoolaha, xanaanada ama farmashiistaha iyo warqad laga haysto Golaha oo ogolaaneysa in la siiyo liisanka.
2) Liisanku waa in u yahay wax ku qeexan foomka ¼ oo lagu bixinaayo shuruudaha ey ka midyihiin in laga xanibo meelaha uu hore liisan uga jiro oo mudaysan haddii Golaha u arko wax haboon.

3) Boodhka waxa laga yabaa, isaga oo cuskanaya qadobka 5.5.7 in uu amar ku bixiyo joojinta diiwaangalinta taaso macnaheedu yahay in aan liisanka lagu shaqeysan Karin oo la tirtirayo

**Qodobka 5.5.6**
**Xuquuqda Shaqada.**

1. Dhakhtar kasta oo liisan leh wuxuu xaq-u-leeyahay in uu ku shaqeysto, wax ku doonto, kuna dacwoodaan, kagana soo ceshado maxkamad kasta oo awood u leh iyada uu sii maraayo maamulka caafimaadka xoolaha iyo/ama hogaanka golaha qoranka ee caafimaadka xoolaha sida ku qeexan shuruucda ku jirta xeerka iyado la sii marinayo Wareegto Wasiir wuxuuna kharash macquul ah saari karaa xirfadiisa, tallooyinka, baadhis iyo qiimaha daawada la siiyey.

**Qodobka 5.5.7**

Ka saarista diiwaanka ama tir-tirida liisanka dhakhtarka caafimaadka:

1) Haddii dhakhtar diiwaan-gashan ama liisan leh lagu helo faldenbiyeed ama dhaqan xumo ama dambi ku cad xeerkan ama ka bacdi marka maamulka caafimaadka baadhay/wareystay iyo/ama Goluhu u arkay dambiile, wax sharaf dhac ku ah, xirfada caafimaadka xoolaha oo uu ku helo maamulka caafimaadka arintuna tahay dhakhtar diiwaan-gashan waxay u amri karaan diiwaan hayaha in uu ka saaro magaca shakhsigaas diiwaanka guud iyo haddii arrintu tahay dhakhtar liisan leh waxa suurtogal ah in arrintana liisanka ay ka tirtiraan qofka noocaas ah.

2) Baadhis/wareysi xubnaha, qaabka loo wado baadhista, wuxuu uu ka qaadan karaa rafcaan go'aanada maamulka caafimaadka iyo G. Qaranka ee caafimaadka oo lagu siin doon shuruucda la dejiyey ee ku jirta xeerkan iyada oo la sii marinaayo wareegtada Wasiir, taaso dabosocodka talo bixinta iyo heshiisyo lala galay **(N.V.B)** iyo Maxkamada Sare.

3) Muddada baadhistu socoto golaha qaranka ee caafimaadka isaga oo ka talo qaatay maamulka caafimaadka xoolaha wuxu amar ku bixin karaan amaba ay caddeynayaan in diwaangelintiisa ama liisanka la siiyey uu yahay mid aan lagu dhaqmayn (shaqeyneyn).

**Qodobka 5.5.8**

**Diiwaan-galinta iyo Xaqa uu Leeyahay Dhakhtar Xanaanada Xooluhu in uu Shaqeysto:**

1) Diiwaan-galinta dhakhtarka xanaanada xoolaha iyo kaaliye xanaanada xoolaha waxaa lagu saleyn doonaa shahaadaadooda waxase ku xidhantay Aqoonsiga iyo ogolaanshaha Golaha Qaranka ee caafimaadka **(N.V.B)** waxaa intaas soo raacay ama waheliya nidaamka/shuruucda ku cayiman kor ee qodobada **5.5.1, 5.5.2** iyo **5.5.3.**

2) Waxay qaban doonaan waajibaadka/shaqada noocaas ah ee la xidhiidha waxbarashadoodii hore iyo xirfadaha aqooneed ee kale oo ay aqoonsadeen, ogolaadeena Golaha qaranka ee caafimaadka xoolaha (N.V.B) iyo shuruucada ku hoos qeexan xeerkan iyada la sii marinaayo wareegta Wasiir.

## Cutubka 5.6

### Hawlaha adeega caafimadka ee ey gutaan dad aan dhakhaatiir aheyn:

### Qodobka 5.6.1

1) Mas'uulka caafimaadka xoolaha ee loo xilsaaray (Gobol, Degmo ) wuxuu u xilsaaran yahay dhamaan hawlaha dhakhaatiirta madaxa-banaan iyo kalkaaliyaasha ama daryeelaha (CBAHWS) hawsha ka wada jiidaas waxay la shaqeyn doonaan masuulka caafimaadka e u xilsaaran dhamaan wixii la xidhiidha adeega caafimaadka xoolaha ee jiidaas.

2) Kaaliyaasha caafimaadka waa in ay diiwaangashan yihiin si ay hawlaha u gutaan waxayna ka hoos shaqeyn doonaan mas'uuliyada dhakhtar caafimaad diiwaan-gashan leh liisan.

3) Hadaba, meelaha aanay ka jirin dhakhtar caafimaad oo diiwaangashan ama kaaliya caafimaad, waxa fulinta hawlaha adeega caafimaad loo ogolaan kara daryeelayaasha/gargarayaasha, taasina waxay ku xidhantahay haddii uu jiro kaaliya caafimaad oo dhakhtar caafimaadka xoolaha u leh liisan uu u idmadokaaliyahaas in uu hubiyo hawlaha ee wadan daryeelayaashu.

4) Xulista, tababarka, cadeymaha, diiwaangalinta, kormeerka iyo hubinta Daryeelaha iyo hawlaha adeega caafimaadka ee uu wado (sida adeegyada asaasiga ah ee caafimaadka xoolaha iyo talaalka Iwm) ee loo oggolaaday iyaga waxay ku qeexannaan doonaa shuruuc hoos immaneysa xeerkan oo wareegto Wasiir, iyada oo lagala tashaday golaha Qaranka caafimaadka xoolaha **(N.V.B)**

5) Maamulka caafimaadka xooluhu wuxu hubin doonaa in hawlaha adeega caafimaadka xoolaha ay wadaan dad aan ahayn dhakhaatiirta caafimaadka xooluhu ay hoos yimaadaan haygalka/maamul jira oo ku xidhan dhakhaatiir diiwaangashan oo si joogto ugu gudbisa talooyin taageero, kuna sameysa kormeer iyo toosin, waxa iyadana sidoo kale la sugi doonaa nadaamka ku wajahan helida hab qorsheyn oo wax laga qabanaayo caafimaadka xoolaha lagagana taxadiraayo dhibaatooyinka dhaqaale ee la xidhiidha isticmaal xumada daawooyinka caafimaadka xoolaha sidii loo yareen lahaa khatarta ey hawlo noocaasi ku leeyihiin caafimaadka bulshada iyo ganacsiga aduunka.

# Cutubka 5.7 (Chapter 5.7)

**Haysasho/Helida iyo Qeybinta Daawooyinka xoolaha**

**Qodobka 5.7.1**

1) Daawooyinka caafimaadka xoolaha waxa loo isticmaali karaa ujeedada hadafka soo socda:-
   b) Ka hortaga iyo daaweynta cudurada xoolaha.
   t) Xakameynta habardugaagga.
   j) Baadhista cudurada xoolaha.

2) Daawooyinka dalka loo soo dhoofiyo waxay noqon doonaan kuwa daruuri ah oo baahi loo qabo oo ey hubiyeen masuuliyiinta caafimaadka xoolaha iyo caafimaadka Dadweynaha. Iyada oo la raacayo ogalaansho maamulka caafimaadka xoolaha iyo talobixinta Golaha Qaranka ee Caafimaadka Xoolaha (N.V.B).
3) Liiska magacyada Dawooyinka daruuriga ah iyo waxyaalaha soo raaca waa in ey soo diyaariyaan masuuliyinta maamulka caafimaadka xoolaha iyaga oo iskaashi la yeelanaaya Golaha qaranka ee caafimaadka xoolaha.

**Qodobka 5.7.2**

Shuruudaha Aqooneyd ee looga Baahanyahay Diiwaangalinta Daawo soo Dajiyaha, Qeybiyaha ama Ibiyaha (sida ku cad Foomka Lifaaqa x 4 ee xeerkan).

1) Qofka raba in loo aqoonsado Daawo soo Dajire ama Ibiye waa in uu yahay Dhakhtar caafimaad, Dhakhtarka farmashiista ah diiwaangashan ama kaaliya caafimaad oo ka hoos shaqeynaaya dhakhtar caafimaadka xoolaha oo leh liisan.

2) Qofka kale (Ganacsada) oo haysta dhakhtar diiwaangashan oo dhakhtar uu masuul ka yahay isticmaalka dalabka, keydinta iyo qaybinta daawooyinka la soo dejinaayo.

3) Qofka raba in loo diiwaangaliyo shakhsi ahaan daawo soo dajiye waa in:-

   b) Waa in uu ka haysto Wasaarada Ganacsiga liisanka soo dajinta oo aan dhicin.
   t) Waa in uu leeyahay dhismooyin ku filan kuna haboon habka keydinta daawooyinka.
   j) Waa in uu ka leeyahay wakiilo ku filan, magaalo madaxda Gobolada Dalka, sida ku cad xeerkan, oo lagu ansixiyey ogolaanshaha maamulka caafimaadka, iyada oo la raacayo talobixinada golaha qaranka ee caafimaadka xoolaha.

**Qobodka 5.7.3**

**Dhismayaasha iyo Shuruudaha keydinta Daawooyinka Xoolaha:**

1) Daawooyinka xoolaha waa in lagu Ibiyo guryo diiwaangashan sida ku cad xeerkan.

2) Guryaha lagu gado daawooyinka xoolaha waa in nadaafadoodu la ilaaliyo lana dayac tiro, waa in ay ka reebanyihiin wasakh iyo cayayaan..

3) Guryuhu waa in ey leeyihiin daaqado hawada isku dhafaan, waana in guryahaas loogu talogalay isticmaalka, keydinta iyo/ama Iibka daawooyinka.

4) Qalabka qaboojinta (guryaha) iyo talaajadaha barafka waa in loo helo, hadaba sida loogu baahanyahay. Si loogu keydiyo looguna xafido dawooyinka.

5) In wixii qalab ah iyo daawo ah la soo Iibiyey ay ku jiraan diiwaanka si loo helo marka ey jirto baahi baadhitaan.

6) Daawooyinka dhacay waa deg deg looga saaro, iyada oo la gubaayo ama gud dheer lagu aasayo/xabaalo ay goob joog yihiin maamulka caafimaadka xooluhu.

**Qodobka 5.7.4**
**Diiwaanka Rasmiga iyo shuruucda Diiwaan-galinta:**

1) Diiwaanka Rasmiga ah waa in uu gacanta ugu jira diiwaan hayaha. Hadaba waxallaale iyo wixii loo ogolaaday in la soo dajiyo, la qaybiyo, iyo Ibka daawooyinka, iyo guryahooda waa in ey diiwaan gashanaadaan (sida ku cad foomka appendix 2 ee xeerkan). Nidaamka diwaangalinta waa in uu yahay mid ku qeexan shuruucda xeerkan.

2) Diiwaan-galinta waa in Sannadwalba la jadiidiyo, haddii aanu soo dajin wax daawo xoolaad ah mudadii uu diiwaangashnaa oo dhan waxaa laga saari doonaa diiwaanka.

3) Diiwaanhayuhu waa in uu ka saaraa magaca qofka diiwaangashanaa ee dhintay ama maqan sabab kale iyado Wasaaradu la tashatay G. Qaranka ee caafimaadka xoolaha in ay ka saaraan dhiiwaanka.

4) Diiwaanhayuhu haddii uu haysto sababo lagu qanco, wuxuu diidi karaa diiwaangelinta wixii dhisme, markuu qaato aragtida maamulka caafimaadka xoolaha iyo
la tashiga Golaha Qaranka Caafimaadka xoolaha inaanay meeshu ku habooneyn in lagu fuliyo shaqada iibka daawooyinka

5) Shakhsina ma Iibin karo dawooyinka iyo waxa la xidhiidha illaa magciisa & caddeynta diiwaangelintu iyo liisankiisu qofka ka mas'uulka ah meherada ay ku cad yihiin guriga meherada lagu sameynayo.

**Qodobka 5.7.5**
**Shuruudaha keenista iyo qaybista:**

1. Maamulka C/Xooluhu iyadoo raacaya talabixinta Golaha Qaranka ee Caafimaadka xoolaha waa in ay u qortaa Wasaarada Ganacsiga in ay siiso Ruqsad (liisan) keenista daawada iyo wixii la xidhiidha dadka diwaangashan sida ku qoran xeerkan.

2. Qofka (kasta) oo doonaya in uu daawo keeno, waa in uu isticmaalaa foomka arjiga ah ee ku cad xeerkan iyo inuu arjigiisa/keeda uu ku soo caddeeyo soo dejinta daawadu.

    b) Soo saaraha (manufacturer) iyo nooca daawada la soo dejinayo
    t) shaygaasi waa in dalkiisu uu si rasmi ah u ogolaado in ay ka iib gali karaan sayladaha, tusaale ahaan shaygaasi waa in uu haysto shahaadad sharci ah oo fasaxeysa Iibka shaygaas {Free sale certificate}.

3. Iibka tafaariiq leh ama jumlad leh ee daaweynta waa in ay wadataa waraaq ay ku cadyihiin isticmaalkeedu sida.

    b) Magaca ganacsiga, magaca firta/jinsiyada iyo walxaha iskudhiska ku jira.
    t) Taxadir keeda
    j) Sedka iyo & xiliga la soo saaray qaabka daawa-qaadashada.
    x) Xilliga ey dhaceyso.
    k) Tirsigeeda [lamber].
    d) Keydinteeda.

4. Haddii warbixinta kor ku xusan aanay daawada dusheeda ku cadayn waa in la keeno warqad ay ku qoran yihiin faahfaahinta aynu kor ku xusnay.

5. Si loo hubiyo/kontoroolo inay suganyihiin warqadaha iyo daceymaha daawooyinka xooluhu, Ibiyuhu waa in uu haysta diiwaan laga raaco, oo si joogta loogala socdosi looga digtoonaado soo dejinta daawooyinka aan habooneyn

## Qodobka 6aad

### Shuruuda kale ee maaliyadda iyo ciqaabta

### Cutubka 6.1

## Shuruucda maaliyadeed

### Qodobka 6.1.1

1)Maamulka caafimaadka xooluhu wuxuu goyn doona khidmadda, "fiiga" uu bixiyo loo adeeguhu ama wixii khidmadda kale ah ee la xidhiidha adeegyo ku xusan xeerkan, isagoo waafijinaya weedha 7, qodobka 4.2.1 ee cutubka 4.2 e qaybta 4aad, kuwaas oo ka kooobnaan doona:

b) Suggidda iyo ka marag kaca caafimaad ee soo dejinta iyo dhoofinta xoolaha iyo oonta xoolaha ka soo jeedda oo loola jeedo inay dadku quutaan.
t) Baadhitaan cudur iyo tijaabooyinka seerooloji ah.
j) Isticmaalka xero guullo,goob karantiin, kawaaano iyo dhismayaal la mid ah kuwaas oo kale.
k) Diiwaan gelinta iyo liisan siinta dhakhaatiirta xoolaha iyo goobaha lagu fuliyo adeegga caafimaadka xoolaha.
d) Ogolaanshaha ama ruqsad bixinta (sida soo dejinta iyo qaybinta dawooyinka xoolaha,tallaalada, kimikada iyo biolojikaliska kale ee la xidhiidha adeegga baadhista iyo hubinta cudurada.
r) Ciqaabaha ku tilmaaman xeerkan kama hor iman karaan xeerka ciqaabta guud ee dalka iyo shuruucda kale ee Maxkamadaha taala.

## <u>Cutubka 6.2</u>

### Xayiraadda, Qalista ama Asturaada Xoolo Buka.

### Qodobka 6.2.1

**Xayiraadda xoolo buka amaba sadheysan.**

Dhakhaatiirta saxeexa lihi waxay yeelanayaan awood ay ku diidaan ama ku ogoladaan dhoofinta nooc kasta oo xoolo ah oo buka ama aan ku haboonayn safar ama muuqaalkiisu aanu ku haboonayn in la dhoofiyo iyo isaga/iyada oo yeelanaysa awoodda uu dib ugu soo celin karo xoolaha noocaas ah goobta takoorka ama xoeryo guullada.

### Qodobka 6.2.2

Damaanad qaadka mulkiilaha xoolaha  masuuliyadda wixii dhaawac soo gaadha xoolaha ama oonta xoolaha intay ku jiraan baadhitaanka.

1) Xoolo ama oon xoolaad ee loo keeno dhakhtar xoolaad si uu fayaqabkooda u hubiyo wixii xoolahaa gaadhaa waxay ahaanayaah darafta mulkiilaha sarkaalkaana loo raaci maayo dhimasho ama dhaawac ku yimaada xoolahaa iyo oonta xoolahaa.Balse haddii la cadeeyo in khasaarahaasi ku yimi dayac ama farsamao qaldan waxa lagu maaraynayaa qawaaniinta uu dhigayo xeerkani.

### Qodobka 6.2.3
### Gawraca xoolo buka

1) Maamulka caafimaadka xoolohu ama hayad ka hoos shaqaysa oo loo xilsaaray way gawrici xoolo kasta oo sadhaysan ama looga shakiyo inay sadhaysan yihiin ama haddii kaleba u banaan baxay ku sadhaysan cudur halis ah oo ku qeexan si gaar ahna ugu tilmaaman qawaaniinta xeerkan.

### Qodobka 6.2.4
### Asturaada raqda neefka la qalay

1) Hay'ad maamul caafimaad xoolaad ( sida dhakhtar baadhe ah) wuu xayiri karaa ama amar ku bixin karaa asturaada ama baabi'inta neef kasta, raqda ama qayb ka mid ah raqda isagoo raacaya qaabka ku sifaysan qawaaniinta uu dhigayo xeerkani.

# Cutubka 6.3

## Shuruucda u gaarka ah eyda

### Qodobka 6.3.1
### Diiwaan gelinta iyo ruqsad siinta:

1) Dadka leh eyda waa inay diiwaan-geliso dawladda hoose ee aagaasi. Mulkiilaha eydaasi waa inuu qaato liisan la cusboonaysiin karo sanad walba.

Ruqsadda waxaa bixinaysa dawladda hoose marka mulkiiluhu la yimaado marag kac tallaal oo uu ka sito maamulka caafimaadka xoolaha ama dhakhtar ka diiwaan-gashan maamulka caafimaadka xoolaha.

### Qodobka 6.3.2
### Takooridda iyo baabi'inta eyda qabta ama looga shakiyo inay qabto cudurka reebiska.

1) Qof kasta oo haysta,leh ama ka masuul ah ey qaba ama looga shakiyo inuu qabo reebis waa inuu wargeliyo dhakhtarka ugu dhaw kaasoo isna si dehdeg ah usii wargelin doona maamulka caafimaadka xoolaha.

2) Maamulka caafimaadka xooluhu wuxuu baabi;in doonaaa ama, meeshii ay jirto meel uu ku hayaa, xayirayaa si uu uga takaooro inuu la kulmo xoolo kale ama dad.

**Qodobka 6.3.3**
**Khaarijinta xoolaha aan cidi lahayn**

1) maamulka caafimaadka xooluhu isagoo la kaashanaya dawladaha hoose wuxuu amrayaa in la khaarajiyo eyda aan cidi lahayn oo la arko inay tiro badteen. Arrintu ma khusaymayso eyda kuwa diiwaan gashan ama liisan lagu siiyay qawaaniinta uu dhigayo xeerkani.

**Cutubka 6.4**
Qabashada xoolo ama oon xoolaad oo la arko inay xeerka ku gefsan yihiin.

**Qodobka 6.4.1**

1) Maamulka caafimaadka xoolaha ama dhakhtar diiwaan gashan oo shaqo ugu jira si xeerka waafaqsan wuu qaban karaa neef ama oon xoolaad isagoo aan waaran u sidan isagoo/iyadoo uu sabab u haysto inay gef ku jiraan xoolahaasi ama oonta xoolahaasi sida uu dhigaayo xeerkani. Xoolahaasi ama oonta xoolahaasi waxaa ka mid noqonaya:
   b) Xoolo ama oon xoolaad oo dalka debedda looga soo dhoofiyay loona soo dhoofiyay qasdi mucayin ah awgeed ,laakiin se la ogaaday inaan loo hayn marag kac cad fayaqabkooda.
   t) Xoolo si sharci darro ah u galay xeryo ay dawladdu ama dad gaar ihi leeyihiin.

2) Xoolaha ama oonta xoolaha ee lagu sifeeyay tuduca 1[aad] ee kor ku xusan waxaa loo wareejin karaa boon, xero ama goob xoolaad oo ay naqshadaysay maamulka caafimaadka xooluhu, ama uu si ku meel gaadh ah u doortay dhakhtarka shaqada ku jiraa dabadeedna ay halkaa ku xayirto maamulka caafimaadka xoolaha ee awoodda u lihi.

3) Marka kasta oo xoolo ama dalag xoolaad oo lagu qabtay laguna xayiray sida ku sifaysan qodobkan, dhakhtarka shaqada ku jira ee fulinaya qabashada waa inuu si aan dib u dhac lahayn uu warbixin u gaadhsiiyaa maamulka Caafimaadka xoolaha.

**Qodobka 6.4.2**
**Ganaaxa xoolo ama oon xoolaad.**

1) Maamulka caafimaadka xooluhu wuxuu amri karaa,isagoo raacaya qawaannninta uu dhigayo xeerkani, wixii ay u aragto macquul si loogu daboolo kharash ku baxaya kaxaynta xoolo ama watreejinta oon xoolaad inta ay xayiraadda ku jireen sida ku sifaysan qodobka 6.4.1 haddii aan la bixin waqtigii ku haboonaa ee la cayimay, xoolahaa ama dalaggaa waa la ganaaxi doonaa.

2) Xoolo kasta ama oon xoolaad oo lagu qabtay laguna xayiray sida uu dhigayo 6.3.1 balse qofkii lagu eedeeyay inuu gefka gaystay iyo kii lahaaba aan la garanaynin ama aan la heli karaynin, xoolaha ama dalagga noocaas ah waa lala wareegi doonaa.

**Qodobka 6,4,3**
**Asturaadda neef la ganaaxay**

1) xoolo kasta ama oon xoolaad oo kasta oo lagu ganaaxay ama lagula wareegay sida xeerkani dhigayo waa la qalayaa,la iibinayaa ama si kale loola dhaqmayaa oo ay amartay maamulka caafimaadka xoolohu oo ah qawaaniinta ku sifaysan xeerkan.

**2)** Marka neef la ganaaxay ama raqdiisa ama oon xoolaad la amro in la iibiyo,iibkaa waxaa loo maamulayaa si la mid goynta fiiga lagu bixinayo adeeg la qabtay ee uu dhigayo xeerkani iyo sida ku cad qodobka 6.1.1 ee cutubka 6.1.

## CUTUBKA 6.5
**Ka Reebanaanta magdhaw.**

**Qodobka 6.5.1**

1) Wax tallaabo ah oo laga qaadi doonaa ma jirayo dhakhtar ku jira shaqo ama hayad u adeegaysa caafimaadka xoolaha iyo maamulka caafimaadka xoolaha markasta oo la falo fal habsami ah oo aan khiyaamo ahayn oo uu dhigayo xeerkani oo la xidhiidha, baadhista,xakamaynta, ka hortagga ama daaweynta cudur halis ah.
Wax magdhaw ah oo laga bixinyaa ma jirayso fal kasta oo xeerkani qorayo haddii aanay sidaa amrin maamulka caafimaadka xooluhu.

## Cutubka 6.6
**Shuruucda ciqaabta**

**Qodobka 6.6.1**

1) Qof kasta oo ku gefa shuruucda uu dhigayo xeerkani wuxuu mutaysan doonaa:
   b) Xadhig.
   t) In lagala wareego tallaalo, dawooyin xoolo, oon xoolaad ama dhismayaal ehel u ah fal denbiyeed la galay.
   j) tirtirka diwaan galin ruqsada ama ogolaansho lagu bixiyay sida uu dhigayo xeerkani.

2) Ciqaabaha ay ka mid yihiin ganaax, ruqsada oo la tirtiro iwm waxaa lagu maamulaya qawaaniinta u dhigayo xeerkani iyada oo la adeegsanayo degreeto wasiir, haddii gefka dhacay aanu ahayn mid uu qabanayo xeerka ciqaabta Guud

3) Wixii aan waafaqsanayn shuruucda tuduca 1 iyo 2 ee kor ku xusan, sharciga dembiyada ayaa lagu qaadi doonaa ee uu dhigayo xeerku, ciqaabtuna khaasatan waxay noqonaysaa waxyaabaha ay ka dhalan karto kana mid yihiin is hortaaga dad gudanaya shaqadoodii, musuq-maasuq, ku tagri fal xafiis iyo in uu hawshiisa qabsado oo uu ku guuldaraysto, diidmadda adeega qabashadiisu sharci tahay, diidmadda in war-bixin la siiyo xubin ka mid ah mihnadda, waajibaad ka baaqsasho warbixineed, khabiir bixiya rayi-been abuur ah ama macnayn been abuura ah iyo been abuur shahaado ama dhokumentis dawladeed.

## Cutubka 7aad

**Laalid Iyo Dhaqan Gal**

1. Wixii xeer ah ee khuseeya Xannaanada Xoolaha ee ka soo horjeeda ama la socon kari waayaa xeerkan wuu burayaa marka laga reebo xubinta **3aad** ee qodobka **6.6.1** ee xeerkan.
2. Lifaaqyada foomamka diwaan gelinta iyo rukhsadaha adeegyada xannaanada xoolaha ee ku lifaaqan xeerkani waxay ka mid yihiin xeerka.
3. Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka uu Madaxwaynuhu saxeexo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

## LIFAAQA FOOMAMKA

### Lifaaqa 1aad

### Diwaangelinta & liisanmada xirfadleyaasha Caafimaadka Xoolaha

**Foom/1/1**

**Arjiga isdiwaangelinta ee dhakhaatiirta xoolaha farmashiiste iyo kaaliyaasha caafimaadka xoolaha.**

***Diiwaan Hayaha***
***Ciwaan ____________Golaha Qaranka ee Caafimaadka xoolaha***

***Aniga …………………………..ka tirsan ……………………….. ayaa ku codsanaya arjigan in laygu diiwaangeliyo in aan ahay dhakhtar xoolaad/Farmashiile/Kaaliye Caafimaad Xoolaha.***
***Caddeymahaygu waa………………………………***
***Waxaan ku soo lifaaqay***

***d) Shahaadooyina la socdo {Dibloomaada}***

*e) Caddaymaha ay rabtaan Golaha Qaranka ee C/Xoolaha*
*f) Laba raad raac waraaqahood………………………*

*taariikhda………………………*

*Saxeex*________________

*Ku qor halkan ku haboon*

**FOOMKA 1/2**

*DR/MR/MS……………………………….Waxa halkan lagugu diwaangeliyay inaad u shaqeystosidii dhakhtar xoolaad/farmashiile/Kaaliye Caafimaadka Xoolaha anaga oo tixraacayna qodobadda sharciga xoolaha ee ku qoran xeerkan caafimaadka xoolaha waxa laga bixiyey hargeysa maanta oo bishani tahay………………………..*

*Khidmad sl/sh……………………….*

*……………………….*

*Diwaangaliye/Golaha Qaranka ee C/Xoolaha.*

*Ku qor halka ku haboon.*

**Liisanka Dhakhatarnimada Xoolaha.**

**Foom 1/3**

*Dr…………………………………….waxa lagula socodsiinayaa in lagu siiyey liisanka l/kiisu yahay……………………………. Si madax banaan uug shaqeysto aqoontaada dhakhtarnimo sida ku cad sharciga koomshinka wasaaradda xoolaha (NVB)*

*Liisankan wuxuu waafaqsan yahay shuruudaha hoos ku qoran:-*
*Waxa laga bixiyey Harg manta…… Bisha …………2002.*
*Khidmad slsh…………………..*
*Diwaan hayaha/ National*

**Lifaaqa 2aad**
**Diwaan galinta dhismayaasha**
**Arjiga diwaan galinta dhismayaasha**

**Foom 2/1**

**Diwaan galiye**
Golaha Caafimaadka xoolaha Qaranka
Aniga/annaga……………………………………………oo raba/na inaan/u samayno meherad ah jumlad/tafaariiqda diwaan galinta xoolaha waxan halkan aanu ku codsanaynaa diwaan galinta dhismaha ku yaala ……………………….
Magaalada………………………
Meherada waxa ka masuul ah………………………………………
Farmashiiste/dhakhtar Caafimaadka xoolaha oo diwaan gashan, si waafaqsan tilmaamaha ku xusan xeerkan.

Khidmada Somaliland shilling………………………………
Taariikhda………………..

Saxeexa codsadaha__________________

Lambarka Dhismaha……………………………………… kuna yaala…………………………………..
Magaalada……………………………………….
Waxa halkan lagu diwaan galiyay si waafaqsan tilmaamaha ku xusan xeerkan in laga fuliyo meherada jumlada/tafaariiqda ee iibka daawooyinka ee uu masuulka/korjooge ka yahay farmashiiste/dhakhtar diwaan gashan
……………………………………..
Taariikhda…………………..
Diwaan haye

(GCXQ)………………….

Magacaabista tartamaha codbixinta doorashada ee gudoomiyaha golaha caafimaadka xoolaha qaranka (GCXQ)
Magaca iyo ciwaanka buuxa ee tartamaha (xarfo waawayn)

---

---

______________________________________________________

magaca iyo ciwaanka buuxa ee soo jeedshaha (xarfo waawayn)
………………………………………………………….
………………………………………………………….
…………………………………………………………
anigu waxaan goaansaday inaan ogolaado magacaabista

saxeexa tartamaha………………..
saxeexaha soo jeedshaha………………

taariikh……………………

**Habka 2aad warqada codbixinta**

**Foom 3/2**

| | |
|---|---|
| | |
| e | Ku samee X halka qiyaasta ee ka soo horjeeda magaca tartamaha ee aad jeceshahay inaa u codaysay |
| Magacayada tartamayaasha | |
| | |

| | |
|---|---|
| 1<br>2<br>3<br>4<br>5<br>6<br>7 | |

**LIFAAQA 4 AAD**
**DIIWAAN GELINTA IYO LIISAN SIINTA SOO DEJINTA IYO QAYBINTA DAAWOOYINKA**
**Codsiga Liisanka Diiwaangelinta Jumladlaha Tafaariiqlaha Dawooyinka Xoolaha**

**FOOFKA 4/1**

**Diiwaan hayaha**
**Golaha Fitinariga ee Qaranka**
**Cinwaanka:**

**Anigoo/annagoo---------------------------ee--------------------------------jecel a inaanu hawl ganacsi oo jumlad/tafaariiq ah ee daawooyinka xoolaha--------------------------ee magaalada-------------------------- waxaannu codsanaynaa in nala siiyo/cusboonaysiiyo liisanka jumladda/tafaariiqda.**
**Dawo yaqaanka ama dhakhtarka hawshan nagu kontoroolayaa waa -------------------------------------------------------------------------------------- oodeggan--------------------------------------------------------------------------**

**Taariikh -------------------------------**

**Saxiisa Codsadaha -----------------------**

**Jumlad/Tafaariiqda Ganacsadaha Daawooyinka .**

**Foomka 4/2**

Mr……………………………………..oo
……………………….sameeyay meherad ku taal
……………………….waxa halkan lagu diwaan galiyay inaad iibiso daawooyinka caafimaadka xoolaha si hab jumlad/tafaariiq ganacsi farmashiiste/dhakhtar diwaan gashan masuul ka ah meherada.

Taariikh…………

**Liisanka Ganacsadaha jumlada/Tafaariiqda Daawooyinka.**

**Foomka 4/3**

Mr……………………………..ee…………………sameeyay meheradda Ku taal ………………………waxa halkan loogu ogolaaday inuu iibiyo daawooyinka caafimaadka xoolaha si hab ganacsi jumladleh/tafaariiqleh

Taariikh………………….

Sarkaalka dawlada hoose……………………..

Xusuus, liisankani wuxuu dhacayaa maalinta………….taariikhda………

**ALLA MAHAD LEH**

**C/Raxmaan Maxamed C/laahi**
**Gudoomiyaha Golaha wakiilada JSL.**

**Maxamed Xasan Kahin**
**Xoghaya Guud ee G/Wakiilada JSL.**